

JAMHUIRIYADDA  
SOMALILAND



REPUBLIC OF  
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQANKA GUUD EE QARANKA  
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النّشرة الرّسمية لجمهوريّة صوماليلاند

Sannadka 5aad

Cadad Gaar ah

22/06/2016

XEERKA DOORASHOYOINKA MADAXTOOYADA  
IYO GOLEYAASHA DEEGAANKA  
XEER LR. 20/2001

Email: garyaqaankaguud@gmail.com  
Web. www.garyaqaankaguud.com

Lama iibin karo  
Not for sale

Sannadka 2016


**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/DEC/222-130/122001

4 December 2001



**DECREETO MADAXWEYNE NO:130/2001**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu arkay:** Qodobada 9aad, 22aad, 25aad, 83aad  
iyo 111aad ee Dastuurka dalka  
Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu tixgeliyey:** Ogolaanshaha Golaha Wasiirada ee  
Xeerka Doorashooyinka  
Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu helay:** Go'aan Lr/GW/KF-15/2000/2001 ee  
14/11/2001 ee uu Golaha Wakiiladu  
ku ansixiyey Xeerka Doorashooyinka  
Golayaasha Deegaanada iyo  
Madaxtooyada (Xeer Lr 20/2001).

**Markuu helay:** Go'aan Lr. GG/JSL/Kal-15/G-  
05/97/11/2001 ee 28/11/2001 ee  
Golaha Guurtidu ku ansixiyey Xeerka  
Doorashooyinka Golayaasha  
Deegaanada iyo Madaxtooyada.

**Wuxuu**

Soo saarayaa Dekreeto lagu baahinayo dhaqangalka  
xeerka No: 20/2001 ee 04/12/2001 ee Doorashooyinka  
Golayaasha Deegaanada iyo Madaxtooyada ee  
Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad Leh,**

**Maxamed Ibraahim Cigaal  
Madaxweyne**

**JAMHURIYADDA SOMALILAND**  
**GOLAHA WAKIILADA**

GW/KF-15/ 194 /2001

14/11/01

**GO'AAN ANSIXIN XEERKA DOORASHOYINKA MADAXTOOYADA**  
**IYO G/DEGAANADA**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

- Markuu Arkay:** Mashruuc-sharciga ku saabsan doorashooyinka ee Xukuumaddu u soo gudbisay.
- Markuu ka doodey:** qodobada mashruuc-sharcigu ka kooban yahay iyo nuxurka uu xambaarsan yahay oo ay Rayiyadoodaa ka dhiibteen in ka badan 28 Mudane.
- Markuu Dhegeystey:** soo jeedinta guudi-farsamo oo Goluhu u saarey isku soo habeynta iyo lafagurka mashruuc-sharciga Oo bandhigey muswadad mashruuc-sharci oo ay si qoto dheer u soo habeeyneen.
- Markuu u Codeeyay:** mashruuc-sharciga doo rashooyinka madaxtooyada iyo degaanada,fadhiijiisii 14/11/2001 Oo ayb goob-jog ahaayeen 43 Mudane.

**WUXUU**

Cod buuxa (unanimous 42 cod) ku Ansixiyey "Xeerkada Doorashooyinka Madaxweynaha & Ku xigeenkada Madaxweynaha iyo Golayaasha Degaanka," Halka cid diideey iyo cid ka aamustey toona aaney jirin, Gudoomiyuhuna aanu cod bixin sida u caadada ah.

Allah Mahad Leh

Maxamed X. Cusman

YOGOOLKA WAJIRI GOLAHA WAKIILADA

C/qadir X. Ismaeil Jirdeh

V/C GUDOOMIYAHU GWAADADA

## GOLAHA WAKIILADA JSL



Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha  
Deegaanka (Xeer Lr. 20/2001)

## GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu arkay:** Qodobada 9aad, 22aad iyo 25aad ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qabo ka digo-rogashada hab-beebleedka iyo xaqijinta himilada umaddu ka dhursugaysay mudada dheer ee u tartartanka xorta ah ee xilalka Qaranka.

### **WUXUU ANSIYIYEY XEERKAN:**

**Qodobka 1aad  
Macnaha Erey-bixinta**

**Doorasho:** Waxa loola jeedaa kala saaridda murashaxiinta u tartamaya xilalka, iyadoo lagu go'aan qaadanayo aqlabiyadda codadka dadka ay khusayso.


**Komishanka:** Waxaa loola jeedaa Guddiga Sare ee loo xilsaaray maamulidda iyo ka garsooridda doorashoyinka.

**Goob-codbixin:** Waxa loola jeedaa goobaha tirooyin dadweynaha ka mid ah oo isku degaan dhaw ka

dhiibanyaan codkooda.

**Goob-doorasho:**

Waxa loola jeedaa bartaa kulmisa goobo-codbixineed oo loogu talagalay in lagu kala saaro laba murashax iyo wixii ka badan.



**Wakiil:**

Waxa loola jeedaa xubinta urur/xisbi u soo wakiishay la socodka hawlaho doorashada ee goob-cod-bixineed ama xafiisyada doorashada.

**Murashax:**

Waxa loola jeedaa xubinta ururkiisu/xisbigisu u soo magacaabay inuu u tartamo xil lagu heli karo doorasho.

**Cod-bixiye:**

Waxa loola jeedaa qofka buuxiyey shuruudaha cod-bixinta ee go'aankiisa ku dhiibanyaan cod.

**Golaha Degaanka:**

Waxa loola jeedaa Golaha cod-bixiyayaasha degmadu u doortaan maamulka iyo sharci-dejinta D/Hoose ee Degmada.

**Gobol-doorasho:**

Waxa loola jeedaa soohdimaha kulmiya degmooyinka doorasho.

**Degmo-doorasho:**

Waxa loola jeedaa soohdimaha kulmiya ugu yaraan hal-goob-doorasho.

**Kursi:**


Waxa loola jeedaa jago-xil oo lagu hananayo doorasho hal qof.



- Astaan/Astaamaha:** Waxa loola jeedaa summadda ama calaamadda u gaarka ah hal xisbi/urur ee lagu aqoonsanayo.
- Liis/liisaska :** Waxa loola magacyada murashaxiinta uu soo gudbiyey xisbi/urur loona kala hormariyey siday u kala helayaan doorashada.
- Ololaha  
Doorashada:** Waxa loola jeedaa hawlgalka ay ururada/axsaabtu iyo murashaxiintoodu ugu tartamayaan iska dhaadhicinta iyo soo kala jiidashada cod-bixiyayaasha.
- Xafiiska dhexe:** Waxa loola jeedaa xarunta ugu saraysa ee laga maamulayo hawsha doorashada ee ay ku shaqeeyaan Komishanka.
- Xafiiska Degmada:** Waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo goobaha cod-bixinta ee degmo.
- Xafiiska Gobolka** Waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee Gobolka.
- Xafiiska Goobta:** Waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee goob-cod-bixineed.
- Goob-joogayaal:** Waxa loola jeedaa kormeerayaasha caalamiga iyo kuwo maxaliga ah ee

hubinaya habsami u socodka  
hawlaho doorashooyinka ee  
Komishanku aqoonsadey.

**Qodobka 2aad**  
**Mabaadiida guud**



Xeerkan waxa lagu maamulayaa doorashooyinka Golayaasha Deegaanada iyo tan Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha JSL.

**Qodobka 3aad**  
**Mudada Xilka**

Mudada xilka ee Murshaxiinta la doorto waxay ahaanaysaa:

- a) Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa 5 sano
- b) Golayaasha Degaanada 5 sano

**Qodobka 4aad**  
**Tirada Golayaasha Degaanada**

Tirada Golayaasha Degaanada ee la soo dooranayaa waxay ahaanaysaa:-

- a) Golaha Degaanka Caasimada 25 Mudane
- b) G/Degaanka Degmooyinka A 21 Mudane  
darajada
- c) " " " B 17 Mudane
- d) " " " C 13 Mudane
- e) " " " D 09 Mudane

## **Qodobka 5aad**

### **Shuruudaha cod-bixiyaha**



- 1) Waa in uu yahay Muwaadin Somaliland u dhashay.
- 2) Waa in aan da'diisu ka yaraan 16 sano, sanadka doorashada la qabanayo.
- 3) Waa in uu xor yahay oo aanu xabsi ku jirin.

## **Qodobka 6aad**

### **Xuquuqda -Cod-bixiyaha**

Cod-bixiye kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamay wuxuu xaq u leeyahay: -

- 1) Wuxuu codkiisa ka dhiiban karaa degmada uu ku sugan yahay ee doorashadu ka socoto.
- 2) Cod-bixiyaha ka maqan dalka jSL wuxuu ka coddbynayaa xafiisyada diblomaasiyadeed ee JSL ku leedahay dibedda ee ugu dhow, haddii aanay jirin ama aanay suuragal ahayn waxa tallo ka gaadhaya Komishanka.
- 3) Codku waa inuu ahaado mid shakhsii ah, xor ah, toos ah, qarsoodi ah oo si siman loo tixgeliyo.
- 4) Cod-bixiye kastaa wuxuu yeelanayaa hal cod oo keliya doorashadiiba.
- 5) Xubnaha Komishanka doorashooyinku ma laha xaqa cod-bixinta inta ay xilka hayaan.

## **Qodobka 7aad**

### **Shaqaalahaa Dawladda & Hay'adaha Dawliga ah**

1. Shaqaalahaa Dawladda, kuwa Hay'adaha madaxa banaan ee Dawladda iyo ciidamada Qaranka Darajo kasta ha lahaadeene looma ogola inay isu sharaxaan doorashooyinka, Degaanada iyo Madaxweynaha ama

Ku-xigeenka Madaxweynaha, haddii aanay shaqo-ka-tegis soo qoran 180 cisho ka hor taariikhda qabashada doorashada. Xilligani doorasho ee hadda (doorashadan hore) mudada shaqo ka tegistu waxay ahaanaysaa 40 cisbo ka hor taariikhda qabashada doorashada.

2. Shaqo-ka-tegidda waxa shardi u ah inay sidaa qoraal ku soo caddeyso xafiiska ama Hay'adda awooda u leh caddayntaas.

### **Qodobka 8aad**

#### **Wakhtiga qabashada doorashooyinka**

Komishanka ayaa cayimaya taariikhaha la qabanahyo doorashooyinka si waafaqsan Dastuurka, waxanay ku soo bixi doontaa Degree to Madaxweyne.

### **Qodobka 9aad**

#### **Goobaha Cod-bixinta**

1. Marka la qabanayo doorashada Madaxweynaha & ku xigeenka waxa dalka loo qaybinayaa gobolo-doorasho (electoral regions) oo loo sii qaybinayo goobo-codbixin (polling stations) iyadoo la waafajinayo soohdimaha Gobolada dalka JSL.
2. Doorashada Golayaasha Degaanada marka la qabanayo soohdimaha maamulka degmada ayaa loo aqoonsanayaa Degmo doorasho (electoral district)), waxaana loo sii qaybinayaa goobo-codbixin, halkaas oo ay ka dhici doonto doorashada Degaanku.
3. Komishanku waa in uu sameeyo goobaha codbixinta ee Degmooyinka/gobolada ugu yaraan 40 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta la qabanayo, waxanu Komishanku arrintaas kala tashanayaa Wasaaradda

Arrimaha Gudaha, Guddoomiyayaasha Gobolada iyo Degmooyinka.



## KOMISHANKA DOORASHOOYINKA JSL

### Qodobka 10aad

#### Qaab-dhismeedka Komishanka Doorashoooyinka


Qaab-dhismeedka xafiisyada Komishanka Doorashoooyinku wuxuu ahaanayaa sidan:-

- a) Xafiiska goobta cod-bixinta doorashada
- b) Xafiiska Degmada ee doorashada
- c) Xafiiska Gobolka ee doorashada
- d) Xafiiska dhexe ee doorashoooyinka.

### Qodobka 11aad

#### Komishanka Doorashoooyinka

- 1) Komishanku wuxuu ka koobnaanayaa 7 xubnood, oo kala ah:
  - a) Guddoomiye iyo 6 xubnood.
  - b) Guddoomiyaha iyo Gudoomiye-xigeenka Komishanka ayaa iska dheddooranaya.
  - c) Mudada xilka ee Komishanku waa 5 sano, oo ka bilaabmaysa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, waana loo cusboonaysiin karaa xilka.
  - d) Shaqaale dawladeed, xubin Barlamana, Xubnaha Golaha Wasiirada, ciidan Qaran iyo Xubin xil u haysa urur/xisbi kama mid noqon karo Komishanka.
- 2) Komishanka doorashoooyinka waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL ka dib marka uu helo soo jeedimaha:
  - a) 2 xubnood oo Golaha Guurtidu soo xulo.
  - b) 2 xubnood oo ay soo xulayaan ururada/xisbiayda mucaaridka ah ee diiwaan-gashan.

- 
- c) 3 xubnood ee kale Madaxweyaha ayaa soo xulaya.
  - 3) Komishanka waxa cod kala badh iyo hal ah (absolute majority) ku ansixinaya Golaha Wakiilada, markuu guddi-hoosaadka Arrimaha Guduuhu soo lubiyo in ay buuxinayaan shuruudaha Xeerkoo tilmaamayo.
  - 4) Xafiiska dhexe ee Komishanka doorashooyinku wuxuu xaruntiisa ku yeelanayaa caasimadda Hargeysa.
  - 5) Komishanka xil-gudashadiisa wuxuu ku salaynayaa Dastuurka iyo Xeerkoo, shirarkoodu wuxuu ku qabsoomayaa Kooram, go'aanadoodu waxay ku ansaxayaan aqlabiyyada.
  - 6) Komishanku wuxuu xilkiisa u gudanaya si madax banaan, lagumana samayn karo wax fara gelin ah haba yaraatee.

### **Qodobka 12aad** **Shuruudaha Xubinta Komishanka**

- 1) Waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay.
- 2) Waa inaan da'diisu ka yarayn 40 jir kana waynayn 60 jir.
- 3) Waa inuu Muslin yahay, kuna dhaqma diinta Islaamka.
- 4) Waa inuu leeyahay aqoon dugsi sare ugu yaraan ama wixii u dhigma.
- 5) Waa inaanu ka mid ahayn urur/xisbi siyaasadeed, kana madax banaan yahay.
- 6) Waa in lagu yaqaan dhawrsanaan, sharaf iyo cadaalad bulshada dhexdeeda.
- 7) Waa inaan dembi ciqaab oo maxkamad horteed kaga cadaadey ku dhicin welligiiba.
- 8) Waa inuu jidh ahaan iyo maskax ahaanba gudan karaa xilka.

## **Qodobka 13aad**

### **Xilka ka qaadista Komishanka**




- 1) Xubnaha Komishanka waxa xilka lagaga qaadi karaa:-
  - a) Markuu jabiyo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay.
  - b) Marka uu xilka gudan kari waayo karti darro ama caafimaad darro awgeed.
  - c) Marka uu ku kaco anshax-xumo, xatooyo, musuq-maasuq iwm.
- 2) Marka arrimaha kor ku xusan la dareemo, waxa Madaxweynuhu u magacaabayaa guddi-baadhiseed ka soo warbixisa si uu go'aan uga qaato.
- 3) Xil ka qaadista Komishanka waxa awood u leh Madaxweynaha, waxase shardi ah in Golaha Wakiiladu ku ansixiyo xil ka qaadistaas cod hal-dheeri ah (simple majority).
- 4) Marka ay banaanaato xubin Komishanka ka mid ah, xil ka qaadis geeri, ama is-casilaad awgeed, waxa buuxinta jagadaas loo raacayaa habka xubintii banaysay ku timi.

## **Qodobka 14aad**

### **Awoodaha Komishanka**

Komishanku wuxuu awood u leeyahay:-

- 1) Inuu cayimo wakhtiga doorashooyinka la qabanaayo, iyagoo Madaxweynaha u gudbinaya si uu Degreeto ugu soo saaro.
- 2) Inay cayimaan tirada iyo goobaha cod-bixinta degmooyinka iyo gobolada.
- 3) Inay magacaabaan, eryaan, anshax mariyaan shaqaalaha xafiiska dhexe, xafiisyada degmooyinka iyo Gobolada Doorashooyinka.

- 
- 4) In ay qorsheeyaan Miisaaniyadaha lagu maamulayo hawlaха doorashooyinka.
  - 5) Inay ku dhawaaqaan natiijoooyinka doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku xigeenka si ku meel gaadh ah, inta aan Maxkamadda Sare ku dhawaaqin.
  - 6) Inay kormeeraan si kedis ah iyo si qorshaysanba goobaha doorashada iyo meel kasta oo hawshooda khusaysa.
  - 7) Inay go'aan ka gaadhaan muranada doorashada ee ka soo gaadha xafisiyada hoos yimaada.
  - 8) Inay sameeyaan daraasad ku saabsan sidii dalka loogu samayn lahaa goobo-doorasho oo murashaxiin ku tartami karto.
  - 9) Inuu diiwaan-geliyo cod-bixiyayaasha ka hor taariikhda doorashada.

### **Qodobka 15aad**

### **Miisaaniyadda Komishanka Doorashada**

- 1) Komishanku wuxuu yeelanayaa Miisaaniyad gaar ah, oo ay soo qorshaysteen, una gudbinayaan Madaxweynaha, taas oo marka laysla ogolaado loo gudbinayo Golaha wakiilada oo ansixinaya.
- 2) Miisaaniyadda doorashada waxay komishanku u isticmaalayaan si madax banaan, iyadoo ay waajib tahay in xisaab-celin saddex biloodle ah u gudbiyaan Xisaabiyaha Guud.

### **Qodobka 16aad**

### **Xafiiska Goobta cod-bixinta**

- 1) Xafiiska goobta cod-bixinta ee doorashu wuxuu ka koobmi doonaa Guddoomiye iyo laba hubiye. Hubiyaha ugu da'da weyn ayaa noqonaya guddoomiye xigeen. Waxa kale oo uu yeelanayaa xoghayn.

- 
- 2) Guddoomiyaha, Xoghayaha iyo labada hubiye waxaa magacaabaya Komishanka, waxaanu samayn karaa isku bedelid haddii loo baahdo.
  - 3) Haddii loo baahdo oo arrin degdeg ahi timaado, Hubiye ama Xoghaynta waxa bedeli kara gudoomiyaha goobta cod-bixinta, iyadoo cod-bixintu socoto, waxanu bedelkaas ka samayn karaa dadka goobta ku sugar ee leh xaqa cod-bixinta sida sharcigu xusayo.
  - 4) Xafiiska goobta cod-bixintu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee goobta.

### **Qodobka 17aad**

### **Xafiiska Degmada ee Doorashada**


- 1) Xarunta degmo kasta waxa jiraya xafiis doorasho degmo. Wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee degmada.
- 2) Xafiiska doorashada ee degmadu waxa kale oo uu yeelanayaa xoghayn iyo laba tiriye.
- 3) Gudoomiyaha, hubiyayaasha, xoghaynta iyo tiriyayaasha waxa magacaabaya Komishainka, isagoo awood u leh kala bedelidooda.
- 4) Xafiiska degmada ee doorashu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee degmada.

### **Qodobka 18aad**

### **Xafiiska Gobolka ee Doorashada**

- 1) Magaalo-madaxda gobol kasta waxaa jiraya xafiis doorasho gobol oo ka kooban Guddoomiye, ku xigeen iyo xoghayn oo uu soo magacaabay Komishanku.
- 2) Xafiiska gobolka ee doorashadu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee gobolka.

**Qodobka 19aad**  
**Hawl-wadeenada Xafiisyada Doorashada**



- 1) Xubnaha Komishanku u magacaabo xafiisyada doorashada waa in loo sheego in xilka loo magacaabay ugu yaraan 15 cisho ka hor taariikhda la qabanayo cod-bixinta.
- 2) Qofkii loo magacaabo xilalka xafiisyada doorashooyinka marmarsiyo shaqada loogama dayn karo, haddii aanu jirin cudurdaar dhab ah oo Komishanku ku qanci karo.
- 3) Xubnaha loo magacaabay xafiisyada doorashada ee goobaha, degmada iyo gobolka waxa dhaarinaya guddoomiyaha Maxkamadda Degmada (dhaar fagaare), dhaartaas oo noqonaysa sidan:

**WAXA IGU WALAAHIYA OO IGU BILAAHIYA  
INAAN HAWSHA DOORASHADA U GUDAN DOONO  
SI XILKASNIMO, DAACADNIMO LEH. INAAN  
DHEX U AHAADO XISBIYADA/URURADA IYO  
MURASHAXIINTA, SHARCIGA IYO CADAALADNA  
AAN KU SHAQAYNAYO**

- 4) Komishanku waxay mid mid dhaarta kor ku xusan kaga hor dhaaranayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
- 5) Xubnaha ciidamada qalabka sida ama kuwa leh qaab-ciidameed, Guddoomiyayaasha gobolada, degmooyinka, golayaasha degaanada, murashaxiinta u taagan doorasho looma magacaabi karo xafiisyada doorashooyinka.
- 6) Hawl-wadeenada goobaha cod-bixinta, kuwa xafiisyada doorashada degmooyinkas/gobolada waxay mudada shaqadoodu ku dhamaanaysaa marka lagu dhawaaqo natijada doorashada, hase

yeeshee Komishanku wuu kordhin karaa mudada shaqada intii uu u baahdo.

- 7) Guddoomiyayaasha xafiisyada doorashada degmooyinka iyo gobolada ma noqon karaan shaqaale dawladeed, ciidan qaran, xubin xisbi/urur. Shuruudaha lagu soo xulanayaa waxay la mid yihiin kuwa Komishanka lagu soo doortay.

### **Qodobka 20aad Gunnada Hawl-wadeenada**

- 1) Gunnooyinka ay qaadanayaa hawl-wadeenada xafiisyada doorashooyinka waxa qorshaynaya Komishanka, iyagoo ku salaynaya xilalka hawl-wadeenadu ku kala magacaaban yihiin.
- 2) Gunnada kala-badh ayaa la siinayaa haddii hawl-wadeenku yahay shaqaale dawladeed ama Hay'ad dawladeed (Public bodies).
- 3) Hawl-wadeenka loo diro hawl meel ka baxsan halka uu ku noolaa wuxuu yeelanayaa gunno-saad (subistence allowance) mudada uu maqan yahay, waxana qorshaynaya Komishanka.

### **Qodobka 21aad Dhawrsanaanta Komishanka, Murashaxinta, Hawl-wadeenada**

- 1) Dhammaan hawl-wadeenada ka hawlgelaya xafiisyada doorashooyinka, wakiilada Ururada/Xisbiyada ee xeerkani tilmaamay waxay sharci ahaan (legal status) la mid yihiin saraakiil guud (public officer).
- 2) Murashaxinta, hawl-wadeenada xafiisyada doorashooyinka iyo wakiilada xisbiyada lama xidhi

- karo xilliga doorashada haddii aan la qaban iyagoo dembi ciqaabiisu gaadhayso 3 sano faraha kula jira
- 3) Haddii uu dembi galo waxaa lagu soo oogi karaa marka ay doorashadu dhamaato ee laga wareejijo hawsha uu u xil saarnaa.
- 4) Komishanku wuxuu leeyahay dhawrsanaan la mid ah ta Golaha Wasiirada mudada uu xilka hayo. Dhawrsanaan ka qaadistoodana waxa loo marayaa sida uu tilmaamayo qodobada 94 (8) iyo 96 (4) ee Dastuurka.


## **QAABKA DOORASHADA**

### **Qodobka 22aad**

#### **Habka Doorasho**

- 1) Habka doorashooyinka degaanada wuxuu noqonayaa **Habka isu qiyaasidda saamiyada kuraasta iyo tirada codadka** uu xisbi/urur ka helo gobol ama degmo (**proportional representative system**). Hase yeeshi doorashada Madaxweynaha iyo Ku xigeenka Madaxweynaha waxay noqonaysaa **habka aqlabiyyadda hal-dheeriga ah (majority system)**, sida dastuurku tilmaamay.
- 2) Doorashada Golayaasha Degaanada xisbi/urur kastaaba wuxuu soo bandhigayaa liiska dadka uu u doonayo in degmada looga doorto. Tirada dadka liiska lagu qorayaa waa in aanay ka yaraan laban-laab xubnaha laga doonayo in degmo kasta laga soo doorto.
- 3) Tirada kuraasida uu helayo liis kasta oo ah dadka loo soo bandhigay inay ka qaybgalaan doorashada Golayaasha degaanka waxa loo xisaabaya qaabka qiyaasta saamiga kuraasta iyo codadka (proportional representative list system).

- 4) Degaamada aanu tartan ka jirin ee la soo bandhigo liis keliya, cod-bixin laga samayn mayo, waxana la qaadanayaa dadka loo soo magacaaabay Degaanadaas, iyadoo ku jaan go'an tiradii degmada laga doonayay, waxana loo raacayaa sida loo soo kala horaysiiyey.



### **Qodobka 23aad**

### **Qaabka Soo Bandhigida Murashaxiinta**

1. Liiska murashaxiinta Golaha Degaanka waxaa soo bandhigaya Guddiga degmada ee ururka/xisbiga, waana in si cad loo soo muujiyaa magaca murashaxa oo saddexan, meesha uu ku dhashay iyo sanadkii uu dhashay; haddii ay jiraan dad isku magacyo ah waa in la sheego naanaysta (haddii ay jirto) iyo magaca oo afaran, waxa kale oo la soo muujinayaa degmada laga sharaxay.
- 2) Liisaska murashaxiinta ururka/xisbiga waxa kale oo la soo raacinayaa:-
  - a) Caddeynta shaqo ka tegidda ee ku xusan qodobka 7aad ee xeerkan.
  - b) 4 koobi oo ay si wanaagsan uga muuqato astaantii ururku/xisbugu.
  - c) Caddeyn uu bixiyey murashax kastaa oo uu ku muujiyey inuu ogol yahay murashaxnimada iyo inuu buuxiyey shuruudaha ku xidhan.
  - d) Rasiidhada bixinta dee baajiga murashaxnimo ee Wasaaradda Maaliyadda ee ku xusan qodobka 25aad ee xeerkan.
- 3) Sida ay murashaxiintu liiska ugu kala horeeyaan ee la isugu xigsiiyey ayaa loo aqoonsanayaa in loo soo kala doortey ururka/xisbiyada gudihiisa.
- 4) Muran kasta oo ka dhasha xeraynta ama bandhigga liis murashaxiin oo ka dhaxa dilaaca xisbi/urur

gudahiisa waxa go'aan ka gaadhaya golaha dhexe ee xisbiga/ururka arrintu khusayso.

**Qodobka 24aad**  
**Astaamaha Liistooinka Murashaxiinta**



- 1) Astaamaha liisaska murashaxiinta ee ururada/xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.
- 2) Xisbi/ururna waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi/urur kale hore ugu isticmaalay doorasho hore.
- 3) Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga, hase yeesh ee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo.
- 4) Xisbi/urur wuxuu isticmaalayaa astaan keliya markuu soo bandhigayo murashaxiintiisa heerka degaanka ama Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa.

**Qodobka 25aad**  
**Deebaaji**

Murashaxiinta u tartamaya xilalka waxay bixinayaan deebaaji aan celin lahayn oo kala noqonaya sidan:-

- a) Sl Sh. 1,000,000 Murashaxiinta Madaxtooyada midkiiba.
- b) Sl Sh. 50,000 Murashaxiinta Golayaasha Deegaanka.

**Qodobka 26aad**  
**Qabashada Liisaska Murashaxiinta**

- 1) Liistooinka murashaxiinta Madaxweynaha & ku xigeenkiisa waa in la geeyo xafiiska Komishanka, kuwa murashaxiinta degaanadana la geeyo

xafiisyada doorashada ee degmooyinka ka hor 6da galabnimo maalinta 45aad intaanay cod-bixintu dhicin, iyadoo ay dhan yihii lifaaqyadiisa ku tilmaaman xeerka.

- 2) Xafiiska Komishanka ama xafiisyadiisa doorashada ee degmooyinka waxay hubinayaan in murashaxiinta liisaska ku qorani buuxinayaan dhammaan shuruudaha u dhigan heerkooda, murashaxa aan buuxin shuruudaha waxa lagu celinayaa urur/xisbigii soo sharaxey si ay bedelkiisa u keenaan muddo loo cayimey.

**Qodobka 27aad**  
**Sheegidda Liisaska Murashaxiinta**

- 1) Komishanka iyo xafiisyadooda degmo kasta waa inay diyaariyaan qaabka sheegidda murashaxiinta iyagoo u habaynaya siday u kala horeeyaan, kana muuqato astaamahoodii.
- 2) Komishanka iyo xafiisyadiisa goob kasta oo cod-bixineed waa inay qoraal ahaan diyaariyo qaab sheegid liisaska murashaxiinta degmada iyadoo lagu dhajinayo goobaha cod bixinta degmada.
- 3) Komishanka iyo xafiisyadiisu waa in ay 30 maalmood ka hor taariikhda cod bixinta ku dhajiyaan liisaska murashaxiinta degmada goobaha fagaarayaasha, boodhadhka ogeysiiska, xafiisyada Dawladda Hoose iwm, sidoo kale waa in suuqa lala maro oo cod baahiye lagu sheego, haddii ay suuragal tahayna idaacadda laga sheego ama wargeysyada lagu baahiyi.

## **OLOLAHA DOORASHOOYINKA**

**Qodobka 28aad**

### **Bilowga iyo Dhammaadka Ololaha doorashada**

Ololaha doorashooyinku wuxuu bilaabmayaa marka la soo dhejiyo ogeysiiska ku xusan Qodobka 27aad ee xeerkan, waxaanu dhamaanayaa 48 saac ka hor taariikhda la qabanayo cod-bixinta.

**Qodobka 29aad**

### **Qabashada Shirarka iyo Banaan-baxyada**


- 1) Dadka qabangabinaya shirarka iyo banana-baxyada la xidhiidha ololaha doorashaada waa inay qoraal ku ogeysiyaan Gudoomiyaha Degmada iyo Saldhigga booliska ay khusayso 48 saacdood ka hor wakhtiga la samaynayo. Gudoomiyaha Degmadu wuu diidi karaa in la sameeyo shirarkaas ama banaan-baxaas, haddii uu ku qanco in waxyeelo loo gaysanayo caafimaadka, anshaxa, ama nabadvilyada guud iwm, waxaana ku waajib ah in uu amro in shirarkaas ama banana-baxaas lagu qaban karo meel uu tilmaamay ama wakhti uu cayimay.
- 2) Magaalo ama tuulo laguma wada qaban karo maalin qudha wax ka badan laba shir iyo banaan-bax.

**Qodobka 30aad**

### **Muuqaalka boodhadhka**

- 1) Muuqaalka boodhadhka iyo waraaqaha dacaayadaha ololaha doorashada waa in la geeyo xafiiska Guddoomiyaha degmada 48 saac ka hor intaan shaaca laga qaadin. Mana jirto wax cashuur ah oo laga bixinayo arrintaas.
- 2) Lama ogola in boodhadhka iyo waraaqaha ololaha doorashooyinka lagu dhejiyo masaajidada,

xafiisyada & gaadiidka dawladda, xarumaha diplomaasiyiinta & ururada caalamiga ah iwm.



**Qodobka 31aad**  
**Hub iyo Lebbis ciidanimo**

Shirarka iyo banaan-baxyada ololaha doorashooyinka waxa ka reebban in loo qaato HUB iyo Lebbis ciidan ama wax u eeg.

**Qodobka 32aad**  
**Wakiilada Aksaabta/ururada**

- 1) Guddiyada dhexe ama kuwa gobolada/Degmooyinka ee ururadu/xisbiyadu waxay wakiil leh xaqa codbixinta u soo diran karaan goob kasta oo codbixin ka dhacayso oo ay murashaxiin ku leeyihii. Wuxuu qabaa (haddii ay jirto), taas oo la diiwaangelinayo.
- 2) Wakiilada ay ururadu/axsaabtu soo dirsadeen waa inay goob-joog ahaadaan marka xafiiska doorashadu hawsha hayo soona jeediyaa wixii tabasho ama caddeyn ay qabaan (haddii ay jirto), taas oo la diiwaangelinayo.
- 3) Magacyada wakiilada ururada/xisbiyada waa in loo geeyo Komishanka ama xafiisyadiisa 10 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Komishanka ama xafiisyadiisu wuxuu siinayaa wakiil kasta qoraal ogolaansho ah oo u fasaxaya inuu geli karo kana hawl geli karo goobta cod-bixinta ee loo soo diray.

**DOORASHADA GOLAYAASHA DEGAANKA**  
**Qodobka 33aad**  
**Shuruudaha Murashaxa Golaha Degaanka**

- 1) Waa in uu yahay muwaadin u dhashay Somaliland.

- 
- 2) Waa inuu si rasmi ah u degan yahay degmada uu iska sharaxayo.
  - 3) Waa in uu muslin yahay kuna dhaqmaa diinta islaamka.
  - 4) Waa inaan da'diisu ka yareyn 35 sano sanadka doorashada la qabanayo.
  - 5) Waa inuu ku sifoobay xilkas, dhaqan toosan bulshada dhexdeeda.
  - 6) Waa in aanu ku dhicin xukun ciqaabeed oo maxkamad horteed kaga cadaadey 10kii sano ee u dambeeyay.
  - 7) Waa in uu leeyahay aqoon dugsi sare haddii uu iska sharaxayo degmooyinka darejada A iyo B. haddii uu iska sharaxayo degmooyinka derajada C iyo D waa inuu lahaado aqoon dugsi dhexe ugu yaraan ama wixii u dhigma.
  - 8) Waa in uu yahay cashuur bixiye degmada uu degan yahay ama uu ka qab qaatey si mutadawacnimo ah hawlo dan guud ah ee degmadaas.

**Qodobka 34aad**  
**Ururada U Gudbi waaya Xisbi**

Ururada ku guulaysan waaya inay u gudbaan xisbi haseyeeshee, doorashada Golayaasha Degaanka ee Degmooyinka qaarkood ku guulaysta kuraas, waxa ku waajibah inay ku biiraan saddexda xisbi ee la ansixiyey midkood.

DOORASHADA MADAXWEYNAHA IYO KU XIGEENKA  
MADAXWEYNAHA

**Qodobka 35aad**  
**Shuruudaha Murashaxa Madaxweynaha iyo Ku**  
**xigeenka Madaxweynaha**



- 1) Shuruudaha murashaxa Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waxay ahaanayaan kuwa ku tilmaamaan Dastuurka qodobka 82aad.
- 2) Xubnaha isu taagaya doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waa in ay ka mid yihiin urur/xisbi diiwaan-gashaan ama ansaxsan, soona sharaxay.

**Qodobka 36aad**  
**Habka Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenka**  
**Madaxweynaha**


Habka lagu dooranayo Madaxweynaha iyo ku xigeenka madaxweynaha wuxuu ahaanayaan kan ku tilmaaman Dastuurka qodobka 83aad, faqradihiisa 1,2,3 iyo 4aad.

**NIDAAMKA MAAMULKA DOORASHADA**  
**Qodobka 37aad**  
**Qalabka Xafiisyada Doorashooyinka**

Komishanka Qaranka ee Doorashooyinka waa inay goob cod-bixineed kasta u diyaarisaa qalabkan:

- a) Nuqul xeerkan ka mid ah.
- b) Xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shaambadii goobta codbixinta oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.
- c) Xidhmo lingaxan oo ay ku jiraan waraaqihii codbixintu.
- d) Sanaadiiqdii codbixinta lagu ridayay.
- e) Weel lagu qaado waraaqaha codbixinta
- f) Saddex foom oo lagu qoro hawlgalka codbixinta.
- g) Foom leh khaanado jeexjeexan.

- h) Qalimo biro ku filan calaamadaynta warqadaha codbixinta.
- i) Ugu yaraan 5 waraaqadood oo tusingaya qaabka cod-bixiyayaashu u calaamadaynayaan warqadaha codbixinta.
- j) Quraarad ah khadka aan tirtirmi karin ee la marinayo codbixiyaasha.
- k) Qalabka qoraalada kala duwan ee loo baahan karo.
- 2) Qalabka ku xusan c, d, e, f, g ee ku tilmaaman faqradda xubinta hore waa inay ahaadaan laba laba oo si fiican loo kala calaamadiyaa haddii wadajir loo qabanayo doorashooyinka Degaanka.
- 3) Komishanku waa inay xafiiska dhexe ee doorasho iyo degmo/gobol kasta u diyaarisaa qalabkan:
- Nuql xeerkan ah.
  - Xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shambadii xafiiska degmada, gobolka ee doorasho oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.
  - Saddex foom oo lagu qorayo hawlgalka codbixinta xafiiska doorashada ee degmada/gobolka.
  - Foom leh shax jeexjeexan (tabulation forms).
  - Qalabka wax lagu qoro oo kala duwan (stationary)
- 4) Qalabka xafiis kasta oo doorasho waa in lagu rido saxarad gaar ah. Saraxadda waa in la xidho oo la lingaxo. Komishanku waa inay qalabkaas dirto wakhti ku habboon iyadoo la socdaan sanaadiiqdii codka lagu rideyey, waxaana loo dirayaa xafiisyada doorashada degmada/gobolka oo u sii gudbinaya goobaha cod-bixinta.

- 
- 5) Komishanku waa inay xafiisyadooda degmo/gobol u diyaariso waraaqo codbixineed oo dheeraad ah oo ku lingaxan kiishash si loo siiyo xafiiska doorasho ee soo codsada, iyadoo ay waajib tahay in ay soo sababeyaan, waxana la gudoonsiinayaah gudoomiyaha goobta cod-bixnta.
  - 6) Meelaha isgaadhsiintu adag tahay Komishanku wuxuu u dhiibi karaa waraaqaha cod-bixinta oo lingaxan oo dheeraad ah kormeerka doorashada ka hawlgalaya si uu u hayo xafiiska doorashada ee degmada/gobolka.

### **Qodobka 38aad Waraaqaha Cod-bixinta**

Waraaqaha cod-bixinta waa inay ku daabacan yihiin astaamaha ururada/xisbiyada oo kor u taagan si afar gees ah. Astaan kastaa waa inay leedahay meel banaan oo loogu talagalay inuu codbixiyuhu ku muujiyo codkiisa. Warqad kastaana waa inay leedahay xidhif yar oo xabagaysan oo lagu rogo warqadda codbixinta oo lagu lingaxo.

### **Qodobka 39aad**

- 1) Goob kasta oo codbixinta laga dhiibanayaah waa inay lahaato laba qol oo yar yar oo loogu talagalay in lala galo calaamadaynta waraaqaha cod-bixinta loona habeeyo in qarsoodi codka lagu hubiyo.
- 2) Sanaadiiqda codbixinta lagu ridayaa waa inay yaaliin meel muuqata ama hareeraha ka xigaan miisaska Gudoomiyaha goobta-codbixinta.

**Qodobka 40aad**  
**Ogeysiinta Liiska Murashaxiinta**



- 1) Halka nuqul ee ku xusan qodobka 27aad ee xeerkan waa in lagu dhejiyo meel la wada arki karo oo ka mid ah xafiiska doorashada ama goobta codbixinta gudaheeda iyo dibeddeedaba.
- 2) Nuqulka ogaysiinta ee ku xusan qodobka 27aad ee xeerkan oo Komishanku ka soo sameeyey liiska murashaxiinta oo u kala horeeya sidii loogu soo gudbiyey waa in lagu dhejiyo banaanka xafiisyada doorashada iyo gudaha meel la wada arki karo.

**Qodobka 41aad**  
**Qaybinta Qalabka Doorashada**

- 1) Xafiiska doorashada degmadu waa in uu hubiyo in goob kasta oo codbixin ka dhacayso in la geeyo wixii qalab ah ee loo baahan yahay markay saacadu tahay 6:00 saac ee subaxnimo ka hor maalinta codbixinta.
- 2) Komishanku waa inuu geeyo xafiiska doorshada degmada qalabka loogu talagalay cod-bixinta ugu dambayn 4ta galabnimo maalinta ka horaysa codbixinta.
- 3) Goobta kasta oo cod-bixineed waa in la siiyo:-
  - a) Nuqul muujinaya magacyada hawl-wadeenada goobta.
  - b) Nuqul muujinaya wakiilada ururada/axsaabta ee goob-jooga ahaanaya.

**Qodobka 42aad**  
**Xafiiska Goobta Cod-bixinta**



- 1) Guddoomiyaha goobta cod-bixinta markuu helo qalabka ku xusan qodobka la soo dhaafay waa inuu:
  - a) Dhiso xafiiska oo uu hubiyayaasha iyo xoghaynta u sheego in ay yihiin hawl-wadeenadii goobta isla markaana la socodsiyo sida ay hawsha loo xilsaaray u gudanayaan.
  - b) Hubiyo in wakiilada axsaabta/ururada ee loo soo ogolaaday inay goob-joog ahaadaan inay joogaan.
  - c) Markuu hubiyo inay saxaraduhu lingaxan yihiin waa in uu furo saxarada oo hubiyo inay dhan yihiin qalabkii, waana in ay goob-joog ahaadaan hawl-wadeenadii goobta iyo wakiiladii ururada/asxaabtu.
  - d) Markuu hubiyo isaga iyo hawl-wadeenadiisa iyo wakiiladu in xidhmooyinka ay ku jiraan shaambada goobta iyo waraaqaha codbixintu lingaxan yihiin, waa inuu furo xidhmooyinka oo waraaqaha codbixinta la dhaco shaambada goobta, oo si nidaamsan ugu rido weel xafidan. Waxaa reebban inay markaas joogto qof aan ahayn inta goobta ku qoran.
  - e) Inuu hubiyo in ogeysiinta ay ku qoran yihiin tilmaamaha codbixinta iyo liisaska murashaxintu ku dhegan yihiin meelihii loogu talagalay.
  - f) In uu huhiyo in qalabkii loo baahnaa ee codbixinta loogu talagalay loo agaasimay sida xeerku tilmaamayo, si hawsha doorashu si hufan ugu hirgasho.
- 2) Waa inuu diiwaan-geliyo dhammaan hawlgalka kor ku xusan in la fuliyey. Qoraalka waa inay ku

cadaato shaambadda goobta, tirada waraaqaha codbixinta ee goobta codbixintu heshay.

- 3) Waa inuu markaa ka saxeexo hawl-wadeenada iyo wakiiladaba in wax waliba sidii loogu talagalay yihiin.
- 4) Markuu hubiye Guddoomiyaha goobta codbixintu in hawshaasi qabsoontay waa inuu ku dhawaaqo in codbixintu furan tahay.

### **Qodobka 43aad** **Awoodda Gudoomiyaha Goobta Cod bixinta**

- 1) Gudoomiyaha goobta cod bixinta waxa waajib ku ah inuu ilaaliyo nidaamka inta doorashadu socoto. Booliska ayuu ku amri karaa inuu qof goobtaa dibedda uga saaro ama in la qabto qof gef ku sameeyay hawsha doorashada ama qof waali ka muuqato.
- 2) Booliska looma ogola inuu galo gudaha goobta codbixinta haddii aanu Guddoomiyuhu amrin.
- 3) Saraakiisha Booliska iyo kuwa shaqaalaha dawladda waa in ay fuliyaan codsiyada Guddoomiyaha goobta si loo hubiyo in si dhib yar codka loo bixiyo oo aanay dhicin in lagu ururo miiska hawladeenada ama goobta agteeda.
- 4) Gudoomiyaha goobta cod-bixinta iyo kuwa xafiiska dhexe waxay xaq u leeyihiin in ay isticmaalaan awoodaha ku qoran xubnaha qodobkan.

### **Qodobka 44aad** **Gelidda Goobta Cod-bixinta**

- 1) Xafiiska goobta codbixinta waxa geli kara dadka maamulaya xafiiska iyo kuwa ka wakiilka ah axsaabta/ururada iyo kuwa codka bixinaya.

- 2) Wuxuu qofayaa in cod bixiyayaashu hub la yimaadaan goobta, markiiba qof ayaa gelaya, iyadoo loo kala hormarinayo sidii loo soo kala horeeyay, hase yeeshay waa la tixgelin karaa inuu ugu hormaro haddii ay jirto qof ka shaqaynaya hawsha doorashada oo doonayo inuu codkiisa bixiyo.

### **Qodobka 45aad**

#### **Talaaboooyinka Ka Horeeya Cod-bixinta**

- 1) Codbixiye kasta wuxuu codkiisa dhiiban karaa markuu:-
- a) Bixiyo tilmaamihiisa ku saabsan magaciisa, aqoonsigiisa iyo da'diisa.
  - b) La hubsado inuu xaq u leeyahay codbixinta oo buuxinayo shuruudaha cod-bixinta, iyadoo si guud mar ah looga eegayo aqoonsigiisa, waraaqaha uu sito, marag-muujin kale ama sidii kale ee kolba loo caddayn karo.
- 2) Calaamad khad aan tirtirmi karin laga mariyo cidida far-yarada gacanta bidix, haddii gacanta bidix maqan tahayna waa in cidida far-yarada gacanta midig laga mariyo, haddii ay labada gacmood maqan yihiin waa in laga mariyo meel kale oo jidhka cod bixiyaha oo la arki karo.

### **Qodobka 46aad**

#### **Cod-bixiyayaasha aan codka dhiiban Karin**

- 1) Wuxuu qofayaa in cod bixiyayaashu hub la yimaadaan goobta, markiiba qof ayaa gelaya, iyadoo loo kala hormarinayo sidii loo soo kala horeeyay, hase yeeshay waa la tixgelin karaa inuu ugu hormaro haddii ay jirto qof ka shaqaynaya hawsha doorashada oo doonayo inuu codkiisa bixiyo.
- 2) Haddii uu jiro qof ay naafonimo u diidey inuu codkiisa bixiyo Guddoomiyaha goobta codbixinta ayaa u ogolaanaya in cod-bixiye kale oo uu


aaminsan yahay inuu gacan siinayo oo ka caawiya sidii uu codkiisa u dhiibban lahaa.

- 3) Xoghayaha goobta codbixinta ayaa qoraalka gelinaya sababta loo ogolaaday in qofkaas naafada ah laga kaalmeeyo sidii uu codkiisa u bixin lahaa, waxa kale oo uu qoraalka ku muujinaya qofka naafada ah iyo qofka kaalmeeyey.

### **Qodobka 47aad**

#### **Nidaamka cod-bixinta**

- 1) Markuu dhamaado hawlgalka ku xusan qodobka kore, Guddoomiyaha Goobta codbixinta wuxuu codbixiyaha siinaya warqadii codbixinta oo lagu dhuftay shaambadii goobta oo laga reebay dabadii hadhaaga ahayd ee laga gooyey.
- 2) Markaa cod bixiyuhu wuxuu gelaya qolka yar ee uu warqadda ku soo calaamadinayo, kuna soo xidhanayo.
- 3) Cod bixiyuhu wuxuu calaamad soo saaraya warqadii codbixinta oo ka soo saaraya dhinaca midig ee astaanta uu codka siinayo, asagoo isticmaalaya qalin Biiro ah oo uu sinaayo xoghayaha goobtu. Ka dib warqaddii wuu soo laabayaa isagoo ku xidhaya dacalkii yaraa ee xabagta lahaa waxaanu ku ridayaaa sanduuqii loogu talagalay cod bixinta.
- 4) Markuu codbixiyuhu warqaddiisa ku rido meesha daloosha sanduuqa, waa inuu goobta ka baxo, waxase ka horaysa inuu Guddoomiyaha goobtu hubiyo in codbixiyaha ay si fiican uga muuqato calaamaddii aan tirtirmayn, markaas haddii aanay calaamaddu si fiican u muuqan waa in lagu celiyo mar kale, si loo cadeeyo inuu codkiisii dhiibtey.

- 
- 5) Haddii codbixiyuhu arko in warqadda la siiyey aanay dhamayn ama dhaawac qabto, waa inuu soo celiyo oo Gudoomiyaha goobta weydiisto mid fayow, arrintaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.
  - 6) Guddoomiyaha goobtu wuxuu xaq u leeyahay inuu goobta ka saaro codbixiye kasta oo cudur-daar la'aan goobta ku daaha oo laga qaado warqadda codbixinta, waxana mar kale loo ogolaan karaa inuu codkiisa dhiibto markay dadkii kale ee goobta ku sugnaa ee codkooda dhiibanayey ay dhamaadaan.
  - 7) Haddii codbixiye lagu helo inuu sito waraaqo codbixineed oo dheeraad ah ama kuwo ka duwan kuwa codka lagu bixinayo ama hore codkiisa u soo dhiibtey, Gudoomiyaha goobtu waa inuu si degdeg ah u amro in la qabto oo booliska u dhiibo si maxkamad loo horgeeyo, arrintaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.

### **Qodobka 48aad Hawlgalka cod-bixinta**

- 1. Hawlgalka cod bixintu waa in la dhammaystiro hal maalin gudaheed oo ka bilaabmaysa 7:00 saac ee subaxnimo kuna dhamaanaysa 6:00 fiidnimo.
- 2. Cod bixintu way soconaysaa wakhtiga xidhitaanka la tixgelin mayo, haddii ay jiraan cod-bixiyayaal safka ku jira oo aan weli codkooda bixin ilaa ay ka dhamaanayaan.

**Qodobka 49aad**  
**Go'aanka cabashooyinka ee goobta cod-bixinta**

Xafiiska goobta codbixintu waa inuu si ku meel gaadh ah go'aan uga gaadho cabashooyinka (haddii ay jiraan) oo ay ka mid yihiin kuwa af ahaan loo soo jeediyey iyo wixii muran ah ee ku hawlgalka goobta cod-bixinta. Cabashooyinka iyo dareenadaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.

**Qodobka 50aad**  
**Hawsha Ka horaysa Tirinta Codadka**

1. Markay cod-bixiyayaashu codkooda bixiyaan Gudoomiyaha goobtu wuxuu cod sare ku dhawaaqayaa in ay codbixintu xidhan tahay.
2. Markuu Gudoomiyaha goobtu ka ururiyo miiska dhammaan waraaqaha iyo qalabka aan tirinta wax ahmiyad ah u lahayn wuxuu bilaabayaa hawsha soo socota:
  - a) Hubinayaa tirada cod-bixiyayaasha isagoo ka eegaya tirada waraaqaha codbixinta.
  - b) Ururinayaa oo tirinayaa waraaqaha codbixinta ee aan la isticmaalin waxaanu ku ridayaan baqshadda 1aad.
  - c) Xaqijinayaa oo saxeexisa ku muujinayaa waraaqaha doorashada ee xumaaday ama aan hagaagsanayn ee ay soo celiyeen codbixiyayaashu, ama la arkay inay xun yihiin, waxaanu ku ridayaan baqshada 2aad.

**Qodobka 51aad**  
**Tirinta Codadka**


- 1) Marka Gudoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha ku xusan qodobka la soo dhaafay wuxuu bilaabayaa tirinta waraaqaha cod bixinta ee sanduuqa ku jira.

Si taa loo fuliyo Hubiyuhu wuxuu markiiba sanduuqa ka soo saarayaa laba warqad cod bixineed, wuxuuna u dhiibayaan Gudoomiyaha, Gudoomiyuhuna wuxuu furayaa warqad cod bixinta oo cod sare ku dhawaaqayaa ururka/xisbiga codka lagu siiyey; warqadaas waxa hubiyuhu u sii gudbinayaa Hubiyaha kale oo isna tusi doonaa wakiilada Xisbiyada/ururada, markaas xoghayaha ayaa gelinayaa foomka khaanadaysan ee loogu talagalay urur/xisbiga codkaas helay waxaanu warqadaas ku ridaya sanduuqa loo sameeyay.

- 2) Ma banana in sanduuqa laga soo saaro warqad kale oo cod bixineed inta tii ka horaysay laga dhamaynayo ee sanduuqa lagu ridayo. Hawsha waxa maamulaya hawl-wadeenada goobta oo keliya.
- 3) Gudoomiyaha goobtu markuu dhameeyo tirinta, wuxuu hubinayaa tirada waraaqaha codbixinta, iyo inay iskeenayaan tirada codadka ururada/axsaabtu guud ahaan heleen, wuxuu intaas raacinayaa tirada codadka lagu muransan yahay ama aan hagaagsanayn ama aanay waxba ka jirin ee ku xusan qdobka 57aad ee xeerkan.
- 4) Gudoomiyaha goobtu markuu caddeeyo ee sidaas saxeexiisa ku muujiyo wuxuu waraqadaha aan saxda ahayn ama waxba kama jiraanka laga soo qaadey ama muranku ka taagan yahay iyo waraaqaha cabashada iyo dacwooyinka ku ridayaan baqshadda 3aad.
- 5) Gudoomiyaha goobtu wuxuu ugu dambeyntii waraaqihii codbixinta ee la tirihey ku ururinayaa baqshadda 4aad.

## **Qodobka 52aad**

### **Xidhitaanka Hawsha Tirinta**



- 1) Markuu Gudoomiyaha goobgtu dhameeyo hawsha tirinta ee ku xusan qdobada kore wuxuu iyadoo fagaare ah ku dhawaaqayaa wadarta tirada codbixiyayaasha, codadka saxda noqday iyo tirada codadka uu helay, liis kasta oo xisbi/urur.
- 2) Intaa dabadeed, Baqshadaha waa la lingaxayaa, korkana waxa lagaga dhufanayaa shaambadii goobta, waxaana korka wadajir uga saxeexaya Gudoomiyaha goobta, ugu yaraan hal hubiye iyo wakiilada xisbi/urur kasta oo murashaxiin ku leh goobta codbixinta.
- 3) Baqshadaha korkooda waxa lagu qorayaa faahfaahinta waxa baqshadda gudaheeda ku jira.
- 4) Hawsha tirinta waa in loo dhammaystiro si isdaba jooga ah ee la soo tilmaamay oo hakad lahayn oo wax kale aan la dhhex-galin.
- 5) Qoraalada raadraaca ahi (records) waa inay si cad u muujiyo hawlaha kor ku xusan.

## **Qodobka 53aad**

### **Codadka Xumaada ama Lagu Muransan yahay**

- 1) Waraaqaha codbixinta marka la tirinayo waxay noqonayaan waxba kama jiraan:
  - a) Haddii ay ka duwan yihii waraaqaha codbixinta ee Komishanku gartay in doorashada loo isticmaalo.
  - b) Haddii aanay lahayn shaambadda goobta codbixinta.
- 2) Waraaqaha codbixinta ee la tiriay waxay noqonayaan waxba kama jiraan haddii:

- 
- a) Haddii warqadda codbixinta ay ka muuqdaan qoraal ama calaamado ama raad si xinfad leh loo soo agaasimay oo aan loogu talagelin in lagu qoro.
  - b) Haddii warqadda codbixinta aanay si fiican uga muuqan karin ururka/xisbiga codka la siiyey oo la aqoonsan kari waayo.
  - c) Haddii warqadda codbixinta ay ka muuqato in cod-bixiyuhu calaamadeyay hal astaan xisbi/urur wax ka badan.
- 3) Codka waxba kama jiraan wuxuu noqon karaa marka go'aan wadajir ah isku raacaan hawl-wadeenada goobta codbixintu. Haddiise ay isku raaci waayaan oo ay ku kala qaybsamaan, waxa waraaqahaas codbixineed loo aqoonsanayaa kuwo muran ka taagan yahay.
- 4) Xafiiska Doorashada ee degmada ayaa go'aan ka gaadhi kara waraaqaha codbixinta ee muranku ka tagan yahay.

### **Qodobka 54aad** **Qoraalka raad-raaca Goobta Codbixinta**

- 1) Qoraalka raad-raaca ee goobta codbixinta waxa lagu qorayaa foom loogu talagalay oo saddex nuql ah, kaas oo Komishanku u soo diyaariyey.
- 2) Laba nuql oo qoraalka raadraaca ka mid ah waa in lagu rido saxaradda oo la raaciyo baqshadaha lingaxan ee ku xusan qodobka 55aad oo loo gudbiyo xafiiska doorashada degmada, nuqlka saddexaad waa in loo gudbiyo Guddoomiyaha xafiiska doorashada ee gobolka, iyadoo la raacinayo wixii ka hadhay agabkii doorashada ee kala duwan.

**Qodobka 55aad**  
**Qaadista iyo Wareejinta Qalabka**




- 1) Gudoomiyaha goobta codbixinta oo ugu yaraan ay la socdaan xubin hawladeenada ka tirsani iyo Boolis ilaal ah ayaa qaadaya qoraalka raadraac iyo baqshadaha goobta kuna wareejinaya xafiiska doorashada ee degmada, iyadoo aan lahayn wax dib u dhac ah.
- 2) Marka xafiiska doorashada ee degmada lagu wareejinayo baqshadaha waa in la hubiyo inay lingaxan yihiin oo aan la furin lana farafarayn. Gudoomiyaha doorashada ee degmadu waa inuu bixiyo caddaynta la wareegidda agabkaas.
- 3) Guddoomiyaha doorashada ee degmaddu wuxuu u gudbinayaa baqshadaha natijadda codbixinta doorashada. Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa oo lingaxan iyo nuqulka saddexaad ee qoraalka raadraaca Gudoomiyaha xafiiska doorashada gobolka.

**Qodobka 56aad**

**Shaqada Xafiiska doorashada ee Degmada**

- 1) markuu Gudoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu helo agabka lagu tilmaamay qodobka 55aad ee xeerkan waa inuu:
  - a) Waa in uu faro hubiyayaaasha, xoghayaha iyo tiriyyaasha inay hawshooda u diyaar garooban.
  - b) Waa inuu u yeedho wakiilada ururad/axsaabta ee murashaxiinku leh degmada ee Komishanku soo ogolaaday inay goobjoog ahaadaan inta hawshu socoto.
  - c) Markay gudoomiyaha, hawl-wadeenada iyo Wakiiladu hubiyaan in ay saxaraduhu lingaxan yihiin oo aan la furin, waa inuu furo saxarada oo ka soo saaro qalabka ku jira oo hubiyaa.

- 
- d) Markay wadajir u hubiyaan in baqshaduhu lingaxan yihiin oo aan hore loo furin, waa inuu furaa baqshadda ay ku jirto shaambadu oo hubiyaa in lambarka shaambadu ku yaal qoraalada.
  - 2) Xafiiska doorashada ee degmadu waa inuu markaas hubiyo in qoraalada iyo baqshadaha ku xusan qodobada 50, 51, 54aad ee xeerkan ay dhan yihiin.
  - 3) Xafiiska doorashada degmadu markuu hubiyo natijada doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa wuxuu u gudbinayaa xafiiska doorashooyinka ee gobolka oo markuu hubiyo u sii gudbinayaa xafiiska dhexe.


### **Qodobka 57aad**

#### **Tirinta Cod-bixinta Doorashada Madaxtooyada**

Gudoomiyaha doorashada ee degmadu markuu qabanayo hawsha doorashada Madaxtooyada waa inuu:

- a) Waa inuu tiriyo oo isu geeyo dhammaan cod bixinta ka soo hoyatay goobaha cod bixinta.
- b) Waa inuu hubiyo codadka waxba kama jiraanka noqday ee ka soo hoyday goobaha cod bixinta.
- c) Waa in uu go'aan ka gaadho codadka muranku ka taagan yahay, sida uu tilmaamay qodobka 53aad ee xeerkan.
- d) Waa inuu isu geeyo codadka xisbi kasta oo murashaxiin ku leh degmada ka helay goobaha codbixinta.
- e) Waa inuu natijada codadka ee soo baxay iyo cabashooyinka (haddii ay jiraan) u gudbiyo Xafiiska doorashada gobolka.

**Qodobka 58aad**  
**Hawsha xafiiska doorashada ee Gobolka**



- 1) Xafiiska doorashada ee gobolku markuu helo nuqulka 3aad ee qoraalada raadraaca goobaha cod bixinta iyo natijada guud ee codadka ka soo baxay degmooyinka gobolka iyo inta xisbi kasta ka helay ee uu soo gudbiyey xafiisyada doorashada ee degmooyina gobolku wuxuu hubinayaa xisaab ahaan natijada codadka.
- 2) Gudoomiyaha xafiiska doorshooyinka ee gobolku wuxuu hawlgalka ka samaynayaa raad raac lagu qorayo foomka loogu talagalay oo saddex nuqul ka kooban, wuxuuna laba nuqul oo ka mid ah u gudbinayaa xafiiska dhexe ee doorashooyinka (Komishanka) kan asliga ahna (original) Maxkamadda Sare ee dalka.
- 3) Xafiiska doorashada ee gobolku markuu helo natijada cod bixinta doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa, wuxuu natijada u gudbinayaa Komishanka si uu u hubiyo uguna dhawaaqo natijada si ku meel gaadh ah.

**Qodobka 59aad**  
**Tirinta codadka doorashada Degaanka iyo ku**  
**dhawaqaqidda natijada**

Gudoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu markuu helo agabka ku xusan qodobka 55aad ee doorashada degaanka markaas waa inuu:-

- 1) Waa inuu tiriyo oo isu geeyo dhammaan cod bixinta ka soo baxday goobaha cod bixinta degmada.
- 2) Hubiyo codadka waxba kama jiraanka ah ee ka soo xerooday goobaha cod bixinta degmada.
- 3) Go'aan ka gaadho codadka lagu muransan yahay.

- GUUD EE QODOBKA
- 4) Tiriyod codadka ansaxay ee urur/xisbi kasta ka helay doorashada degmada.
  - 5) Xisaab ahaan isu qaybiyo tirada guud ee codadka ansaxay ee degmada iyo tirada kuraasta degaanka degmada, soona saaro inta urur/xisbi waliba ka helayo codadka.
  - 6) Hubiyo urur/xisbi kasta inta uu ka helayo kuraasida degaanka.
  - 7) Markaas ku dhawaaqo magacyada murashaxiinta ee xisbi/urur kasta ku guulaystay doorashada, iyagoo isugu xiga siday u kala horeeyeen, sida uu tilmaamayo qdobka 23aad ee xeerkan.
  - 8) Natijada doorashada degmada si fagaare ah ugu dhawaaqo kuna dhejiyo boodhka xafiiska doorashada ee degmada magacyada murashaxiinta guulaystay.

### **Qodobka 60aad**

#### **Gudbin Raad-raac (records)**

- 1) Raadraacyada hawlgalada ku xusan qdobada 55aad, 56aad iyo 58aad ee xeerkan waxa lagu qorayaa foomamka Komishanku u diyaariyey mid kasta, waana inay ahaadaan min saddex nuqlu.
- 2) Nuqlada raadraacyada (records) waxaa loo qaybinayaa sida uu tilmaamayo qdobada 55,58aad ee xeerkan.

### **Qodobka 61aad**

#### **Soo Saaridda Go'aanada Doorashooyinka Degaanada**

Xafiiska doorashada ee degmaddu waa inuu soo saaro go'aanka doorashada degmada, iyagoo ku muujinaya qoraal kooban oo ay ku qoran yihiin magacyada murashaxiinta ku guulaystay doorashada degaanka, waxaana lagu dhejinayaa xafiiska maamulka Dawladda

Hoose ee ay khusayso. Iyagoo nuqlu ka mid ahna u gudbinayaa xafiiska dhexe.

**Qodobka 62aad**  
**Hubaal-celinta doorashada Degaanada**



- 1) Gudoomiyaha Maxkmadda Gobolku waa inuu hubaal-ceeliyo oo ansixiyo go'aanka doorashada Golayaasha degaanada. Waa inuu go'aan ka gaadho wixii muran ama cabasho ah ee guud ahaan uu u soo gudbiyey xafiiska doorashada ee degmadu ee soo baxay intii hawshu socotey.
- 2) Wixii tabasho ama dacwad ah ee aan loo keenin xafiisyada doorashada waxaa loo gudbin karaa maxkamadda gobolka 10 cisho gudahood oo ka bilaabanta maalinta lagu dhawaaqo natijjada doorashada.

**Qodobka 63aad**  
**Hawsha Xafiiska Dhexe ee Doorashada**

- 1) Gudoomiyaha Komishanku markuu helo qalabka iyo qoraalada raadraaca ee ku xusan qodonka 60aad ee xeerkan, waa inuu:-
  - a) Inuu faro kaaliyayaasha iyo xoghaynta inay u diyaar-garoobaan hawsha.
  - b) U yeedho Wakiilada ururada/axsaabta si ay goob-joog u ahaadaan marka hawshu socoto.
  - c) Inay wadajir u hubiyaan in baqshaduhu lingaxan yihiin oo aan la furin, markaa waa inuu furaa oo ka soo saaraa agabka ku jira.
  - d) Inay wadajir u hubiyaan in baqshaduhu lingaxan yihiin oo aan la furan, markaa waa inuu furo baqshadda ay ku jirto shaambadda xafiiska doorashadu, waana in qoraalka raadraaca lagu muujiyo lambarka shaambada.
  - e) Waa inuu qalabka hadhay u gudbiyo xoghayaha.

2. Xafiiska dhexe ee doorashooyinku waa inuu markaas hubiyo inuu helay qoraalka raadraaca ee ku xusan qodobka 60aad ee xeerkan oo laga doonayo xafiisyada doorashooyinka ee degmooyinka/gobolada.



**Qodobka 64aad**  
**Ku dhawaaqidda Natijada Doorashooyinka**  
**Madaxtooyada**

- 1) Gudoomiyaha Komishanku markuu ka helo xafiisyada doorashooyinka ee degmooyinka/gobolada waa inuu:-
  - a) Go'aan ka gaadho dacwooyinka la xidhiidha codbixinta iyo tirinta.
  - b) Tiriyo oo isku geeyo (xisaab ahaan) codadka ansaxay, kuwa xumaaday ama waxba Kama jiraanka ah ee ka yimid xafiisyada doorashooyinka gobolada.
  - c) Markuu si walba u hubiyo ee uu ku qanco in hawshu si habsami u dhacday, wuxuu si ku meel gaadh ah ugu dhawaaqayaa natijoooyinka doorashada Madaxweynaha iyo ku Xigeenka Madaxweynaha.

**Qodobka 65aad**  
**Dacwadaha Doorashada**

- 1) Dacwadaha ku saabsan doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waxa awood u leh Maxkamadda Sare, waana in dacwadaasi soo gaadho kaalinta Maxkamadda 20 maalmood gudahood oo ka bilaabmaya marka lagu dhawaaqo natijada doorashada. Haddii ay

wakhtigaa dhaafto dacwadaasi wax tixgelin ah ma yeelanayso.

- 2) Maxkamadda Sare markay hesho qoraaladda raadraaca ee xafiisyada gobolada ee doorashada iyo kuwa xafiiska dhexe ee Komishanka isla markaana hubiso xisaab ahaan iyo sharci ahaan doorashada waxay ku dhawaaqaysaa natijada doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa.

**Qodobka 66aad**  
**Dhaqan-galka**

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

**Allaa Mahad Leh**  
**Dhamaad**

Maxamed Xuseen Cismaan  
Xoghayaha Guud G/Wakiilada

C/Qaadir X. Ismaaciil Jirdeh  
K/S Guddoomiyaha G/Wakiilada

# Lifaaqa 1aad

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



## THE PRESIDENT

JSL/M/DECM/249-1656/072009

29/07/09

## DECREE TO MADAXWEYNE NO:391/072009

### **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Markuu arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Helay:** Go'aanka GW, Go'aan Lr. GW/KF-C09/452/2009 ee ku suntan 26/07/2009 iyo Go'aan GG, Go'aan Lr. 03/kal-fadhiga 38aad/07/09 ee 22/07/2009 kaasi oo ay ku ansixiyeen Mashruuca Wax-ka-beddelka Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka & Madaxtoyada Xeer Lr. 20/2001.

### Wuxuu Soo Saaray

Mashruucan oo lagu baahinayo dhaqan-galka wax-ka-beddelka iyo kaabidda lifaaqa u ah Xeerka Doorashooyinka (Xeer Lr. 20/2001).

**Allaa Mahad Leh,**

*Daahir Rayaale Kaahin*

*Madaxweynaha JSL*

Samhuuriyada Somaliland

## GOLAH A WAKILADA

Xarunta, Hargeysa



Republic of Somaliland

## HOUSE OF REPRESENTATIVES

HQ, Hargeisa

Our ref: Go/ KF - QPCQ/452/09

Date: 26/07/09

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Wax-ka-bedelka iyo Kaabidda  
Lifaaga u ah Xeerka Doorashoovinka (Xeer Lr:20/2001)**

### GOLAH A WAKILADA JSL

**MARKUU ARKAY:** - Qodobada **9<sup>aad</sup>**, **22<sup>aad</sup>**, **83<sup>aad</sup>** iyo **111<sup>aad</sup>** ee dasturka JSL.

**MARKUU TIXGELIYAY:** - Baahida Loo qabo in la waafajiyi nidaamka cusub ee diiwaan gelinta xeerka doorashooyinka **X/ Lr:20/2001**

**MARKUU KU QANCAY:** - In lagama maarmaan ay tahay in la helo wax ka bedel lifaaq u noqon doona **X/ Lr:20/2001**.

**MARKUU GARAWSADAY:** - Baahida loo qabo in aan dib u dhac ku iman doorashada madaxtooyada ee inagu soo fool leh

**MARKUU U CODEEYAY:** - Fadhiisi **18/07/009** oo ay goob joog ahaayeen **46 mudane** oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiilada.

### WUXUU


Cod aqlabiyyad ah (39) cod oo gacan tag ah ku ansixiyey wax-ka-bedelka iyo kaabida Xeerka Doorashooyinka **X/ Lr: 20/2001**, halka ay ka aamuseen (5) **mudane**, hal **mudane** uu ka diiday, Gudoomiyuhuna **muu codayn** sida caadada ah.

ALLAA MAHADLEH

Maxamed Xassan Kaahin (Keyse)  
Xog. Guud ee Golaha Wakiilada

C/raaxmaan Maxamed C/laah (Ciro)  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABISTA LIFAAQA U AH  
XEERKA DOORASHADA GOLEYAASHA DEGAANKA IYO  
MADAXTOOYADA (XEER Lr. 20/2001)



Wax-ka-beddel ama/yo kaabiseed waxay saamayn ku yeelanaysaa qdobada **5, 6, 28, 37 (1), 37 (3), 37 (5), 37 (6), 39, 45, 47, 51 (1), 51 (4), 51 (5), 54, 55 (3), 56 (3), 57, 58 (1), 58 (2), iyo 58 (3)** ee Xeerka Doorashada Goleyaasha Degaanka iyo Madaxtooyada (Xeer Lr. 20/2001).

**Qodobka 5aad:**  
**Shuruudaha cod-bixiyaha**

Qodobka 5aad ee Xeerka oo ku saabsan shuruudaha cod-bixiyaha waxa lagu kordhiyey faqradd 4<sup>aad</sup> oo cusub oo u qormaysa sidan.


4. **Waa in uu yahay cod-bixiye ka diiwaan-gashan goobta uu ka codaynayo, haddii aanu ka mid ahayn hawladeennada xafiiska goobta codbixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta ama ciidanka booliska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka goobta codbixinta.**

**Qodobka 6aad:**  
**Xuquuqda Cod-bixiyaha**

Qodobka 6<sup>aad</sup> ee Xeerka oo ku saabsan xuquuqda cod bixiyaha faqraddiisa 1<sup>aad</sup> waxa loo beddelay sidan:

1. **Inuu codkiisa ka dhiibto goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaan-gashan yahay.**

Isla qodobka 6<sup>aad</sup> ee xeerka waxa lagu kordhiyey faqradd 6aad oo cusub oo u qormaysa sidan:-

- 
6. Hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka booliska ee sida rasmiga ah ugu xilsaar ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu waxay ka codayn karaan goobta codbixineed ee ay ka hawigelayaan maalinta cod-bixinta.

#### **Qodobka 28aad:**

#### **Bilawga iyo Dhammaadka Ololaha Doorashada**

Qodobka 28aad ee xeerka oo ku saabsan bilawga iyo dhammaadka ololaha doorashada, waxa laga dhigay faqradda 1<sup>aad</sup> ee qodobka: waxaana qodobkaas lagu kordhiyey faqradd 2<sup>aad</sup> oo cusub oo u qormaysa sidan:-

2. Haddii muddada obole Doorasho ku beegmo bisha barakaysan ee Ramadaan, si xisbigii doonaa uu miisaanka ololihiisa uga soo hormariyo bisha Ramadaan, waxa ololaha doorashadu bilaabmayaa 60 (lixdan) maalmood ka hor maalinta cod-bixinta, waxaanu dhammaanayaa 48 saacadood ka hor maalinta cod-bixinta.

#### **Qodobka 37aad:**

#### **Qalabka Xafiiska Doorashada**

- 1) Qodobka 37aad, faqradiisa 1aad ee xeerka oo ku saabsan Qalabka Xafiiska Doorashada ee goobta waxa lagu kordhiyey saddex xubnood oo cusub oo kala ah "I", "m" iyo "n" waxaanayu qormayaan sidan:-
  - i) Liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha loo qoondeeyey in ay codkooda ka dhiibtaan goobtaa cod-bixineed;

- m) Mastarad aanu dhererkeedu ka yaraanin khaanadaha liiska ee cod-bixiyaha macluumaaadkiisu ku qoran yihiin;
- n) Aalad gaar ah oo lagu dalooliyo kaadhadhka cod-ixiyeyaasha (special instrument for punching voters' cards).
- 2) Qodobka 37aad, faqradiisa 3aad ee xeerka oo ku saabsan Qalabka Xafiiska Doorashada ee Degmada/Gobolka waxa lagu kordhiyey xubin cusub oo ah "f" oo u qormaysa sidan:-
- f. Liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha degmada/gobolka.
- 3) Qodobka 37aad, faqradiisa 5aad ee xeerka oo ku saabsan in Komishanku waraaqo dheeraad ah u diyaarinayo xafiisyadooda degmo/gobol, waxa loo beddelay sidan:-
5. a. Komishanku wuxuu tirade waraaqaha cod-bixinta ee goobta codbixinta ku jaango'anayaa tirade cod-bixiyeyaasha goobta codbixinta ee ku cad liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha goobtaas cod-bixineed oo lagu daray tirada dadka ka hawlgelaya goobta cod-bixinta oo ka kooban hawladeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka booliska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixinta.
- b. Komishanku wuxuu goob kasta oo cod-bixineed u diyaarinayaa waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah oo aanay tiradoodu ka badnayn

2% tirada waraaqaha ee ku xusan xubinta "a" ee faqraddan, lambarradooda iyo goobaha cod-bixineed ee loo kala dirayana lagu qorayo diiwaan gaar ah oo Komishanka Doorashooyinka Qaranku leeyahay; waxaana goobta loogu ridayaan baqshad xidhan oo gaar ah oo lagu rido sanduuqa doorashada ee goobta cod-bixineed.

- c. Waraaqaha dheeraadka ah waxa loo adeegsanayaa oo keliya beddelaadda waraaqaha cod-bixineed ee xumaada intaan lagu codeyn, taas oo ay waajib tahay in ay ku wada qancaan guddoomiyaha iyo wakiilada axsaabta u jooga goobta codbixinta. Mar kasta oo warqad ka mid ah waraaqaha dheeraadka ah lagu codeeyana waa in la diiwaan-geliyaa asbaabaha kalifay.
- 4) Qodobka 37aad, faqradiisa 6aad ee xeerka oo ku saabsanayd in meelaha is-gaadhsiintu adag tahay loogu dhiibi karo waraaqo dheeraad ah kormeerka doorashada waa la tirtiray gabi ahaanba.

#### **Qodobka 39aad:**

Qodobka 39aad ee xeerka oo ku saabsan habaynta goobaha codbixinta waxa lagu kordhiyey faqrad 3aad oo cusub oo ku saabsan habaynta liisaska rasmiga ah ee codbixiyeasha, waxayna u qormaysaa sidan:-

3. Liiska dadka ka diiwaan-gashan isku goob doorasho, waxay qoraal ahaan u kala horreynayaan siday xuruuftu u kala horreeyaan iyada oo laga duulayo magacooda 1<sup>aad</sup> haddii ay ku kala bixi waayaana magacooda 2<sup>aad</sup>, hadii ay kaas ku kala bixi waayaana kooda 3<sup>aad</sup>, haddii kaas ka sinmaanna kooda 4<sup>aad</sup>.

Sidaa awgeed, qodobka 39aad waxa loo sameeyay ciwaan cusub oo noqonaya sidan:-

**"Habaynta Liisaska rasmiga ah iyo goobaha codbixineed"**



**Qodobka 45aad:**  
**Tallaabooyinka ka Horreeya Cod-bixinta**

Qodobka 45aad ee Xeerka oo ku saabsan tallaabooyinka ka horreeya cod-bixinta waxa loo beddelay sidan:-

**Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa dhiiban karaa ka dib marka:**

1. uu kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye-ku-xigeenka goobta Cod-bixinta (ahna labada hubiye kooda da'da weyn), si uu u hubiyo in uu yahay kaadh cod-bixineed oo sax (valid) ah, horena aan loogu soo codeyn, isla markaana hubiyo in far-yaradiisa bidix, haddii aanu lahaynna far-yaradiisa midig, haddii aanu taana lahaynna meelaha muuqda ee jidhkiisa in aanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gudbiyo xoghayaha goobta, iyadoo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiillada xisbiyadu.
2. Uu xoghayaha goobtu ka helo magaca kaadhka ku qoran liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha goobta, isla markaana uu hubiyo in ay is waafaqsan yihiin lambarka kaadhka ku qoran iyo lambarka kaadhka ugu diiwaan-gashan liiska cod-bixiyeyaashu, dabadeedna uu


**codbixiyuhu suulka bidix saaro meesha liiska cod-bixiyeyasha ah ee loogu tala-galay.**

3. Uu tallaabooinka faqradaha sare ee qodobkan ku xusan u gutto si dhamaystiran oo nidaamka waafaqsan, kuna wada qancaan hawladeenada iyo wakiilada Axsaabta ee goobta codbixinta ku sugani ayaa cod-bixiyaha loo goyn karaa warqadda cod-bixinta.

**Qodobka 47aad:  
Nidaamka Cod-bixinta**

Qodobka 47<sup>aad</sup> ee xeerka oo ku saabsan nidaamka cod-bixinta waxa loo beddelay sidan:

1. **Marka la dhammadhiis-tiro hawlahu ku xusan qodobka 45aad ee cusub (as amended) ayuu xoghayuhu**
  - a) **cod-bixiyaha u goynayaa warqadda codbixinta isagoo xaqiijinaya in dabadii hadhaaga ahayd ee warqaddaa cod-bixineed ku hadhay buugga, u shaambadaynayaa, kuna wareejinayaa si uu ugu soo codeeyo.**
  - b) **kaadhka cod-bixiyaha u gudbinayaa Hubiyaha kale ee goobta;**
  - c) **xariijin ka tallaabinyaa magaca cod-bixiyaha iyo dhammaan xogta kale ee cod-bixiyaha ee ku qoran khaanadaha cod-bixiyahaas ee liiska, isagoo adeegsanaya mastaradda iyo qalin, ilaaliyana in magaca cod-bixiyaha iyo xogtiisa kaleba la akhriyi karo xarriijin-marinta ka dib.**

- 
- 2. Haddii uu arko cod-bixiyuhu intaanu codayn in warqadda cod-bixintu aanay dhammayn ama ay jeexan tahay, wuu soo celinaya, waxaanu codsanayaa in loo beddelo, dhacdaasna waa in la diiwaan-geliyaa.**
  - 3. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed gelaya qolka yar ee waraaqaha lagu soo calaamadiyo.**
  - 4. Isagoo adeegsanaya mid ka mid ah qalimmada goobta, ayuu cod-bixiyuhu calaamadinaya meel ka mid ah qaybta warqadda ee u gaarka ah xisbiga/musharraxa uu doonayo in uu u codeeyo, dabadeedna uu soo laalaabaya warqadda kana soo baxayaa qolka calaamadinta warqadda.**
  - 5. Intaa ka dib ayuu cod-bixiyuhu wuxuu ku ridayaa warqaddiisa cod-bixinta sanduuqa cod-bixinta.**
  - 6. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed u imanayaa Hubiyaha labaad ee loo soo gudbiyey kaadhkiisa, kaas oo far-yaradiisa bidix u marinaya khadka aan masaxmin, haddii aanu far-yaro bidix lahaynna, faryarada gacanta midig, haddii aanu labada faryaro midna lahayna farta kale ee u soo xigta iyadoo gacanta bidix mudnaanta khadaynta la siinayo, haddii aanu labada gacmood midna lahaynna meeshii kale ee jidhkiisa ah ee muuqanaysa.**
  - 7. Intaas ka dib ayuu hubiyaha labaad siinayaa cod-bixiyaha kaadhkiisii oo uu dalooliyey, isagoo adeegsaday aaladda loogu talogalay daloolinta kaadhadhka, cod-bixiyuhuna uu si**

**degdeg ah uga baxayaa goobta cod-bixinta  
isagoo anshaxa dhawraya.**

**8. Qof kasta oo ka mid ah hawl Wadeenada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu, wuxuu codkiisa dhiibana karaa (isagoo u maraya tallaabooyinka ku xusan 1-6 ee qodobkan) isla marka goobta codbixinta la diyaariyo ee hawl Wadeenada Goobta cod-bixinta iyo wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixintu ay isla hubiyaan in**

**kaadhka qofkaasi yahay mid sax (valid) ah horena aan loogu soo codayn, foomka uu Komishanka Doorashooyinka Qaranku u soo diyaariyeyna lagu qoro:**

- a) Magaciisa oo afarran;**
- b) Lambarka iyo magaca goobta uu ka diiwaangashan yahay;**
- c) Lambarka iyo magaca goobta uu ka codaynayo;**
- d) Xilka uu ka hayo goobta cod-bixinta;**
- e) Saxeexa suulkiisa bidixna uu dhiga meesha foomka loogaga talo-galay.**

**9. Qof kasta oo ka mid ah dadka ku xusan faqradda 8<sup>aad</sup> ee qodobkan waxa kaadhkiisa codbixinta haynaya, ka dib markuu hubiyaha 2aad dalooliyo, Guddoomiyaha goobta codbixinta oo dib u siin karaa uun ka dib marka**

**la soo gebgebeeyo hawsha doorasho ee goobta cod-bixinta.**



10. Guddoomiyaha goobtu wuxuu ku ilaalinaya hawladeennada kale ee Xafiiska doorasho ee goobta gudashada xilkooda, waxaanu u gacan-bannaanaanayaa kala-socodsiinta hawsha goobta.
11. Guddoomiyuhu wuxuu awood u leeyahay in uu debedda uga saaro cod-bixiyaha cudur-daar la'aan dhex meeraysta goobta iyo in uu cod-bixiyahaas dib uga soo celiyo warqadda cod-bixinta. Cod-bixiyahaas waxa loo oggolaanayaa in uu codkiisa dhiibto ka dib marka dadka safka taagani codkooda wada dhiibtaan.
12. Haddii uu cod-bixiye la yimaaddo goob cod-bixineed kaadh aan waafaqsanayn goobtaas, Guddoomiyuhu wuxuu u tilmaamayaa goobta cod-bixineed ee uu kaadhkiisu waafaqsan yahay.
13. Cod-bixiye kasta oo sita kaadh cod-bixineed oo aanu lahayn ama waraaqo cod-bixineed oo dheeraadah ama ka duwan kuwa la isticmaalayo, Guddoomiyuhu wuxuu si degdeg ah u amrayaa in laga qaado, hadday suurto-gal u noqotana wuxuu u dhiibayaa ciidanka nabadgeyada si dacwad loogu oogo, dhacdadaasna qoraal ayaa lagu diiwaangelinaya.

**Qodobka 51aad:  
Tirinta Codadka**



- 1) Qodobka 51aad, faqradiissa 1aad ee xeerka ee ka hadlaya nidaamka tirinta codadka ereyga "laba" ee ku qoran weedha labaad ee faqraddan waxa loo beddelay "hal".
- 2) Qodobka 51aad, faqradihiisa 4aad iyo 5aad ee xeerka ee ka hadlaya baqshadaha lagu kala ridayo codadka xumaaday ee wax-kama-jiraanka laga dhigay codadka lagu muransan yahay iyo codadka ansaxay ee la tiriye, waxa loo beddelay sidan:-

**4. Guddoomiyaha goobtu, markuu caddeeyo ee uu sidaas saxeexiisa ku muujiyo:**

- a) Wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee wax-kama-jiraanka laga dhigay iyo waraaqaha cabashada ee wakiillada xisbiyada ku ridayaa baqshadda 3<sup>aad</sup>.
  - b) Wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee lagu muransan yahayna ku ridayaa baqshadda 4<sup>aad</sup>.
  - c) Ugu dambayntiina, wuxuu waraaqaha ansaxay ee la tiriye ku uruurinayaa baqshadda 5<sup>aad</sup>.
- 5. Haddii sanduuqa cod-bixinta laga helo waraaqo dheeraad ka ah ama ka duwan kuwii goobta lagaga codeeyey, sida iyaga oo aan lahayn shaambaddii goobta, lambarkii waraaqaha cod-bixinta ee goobta amaba nooc ahaan aanay ula mid ahayn waraaqaha lagaga codeeyay goobta, hawladeennada goobta cod-bixineed waxay ka dhex saarayaan waraaqaha la tirinayo, waxayna tusayaan wakiillada xisbiyada ee goobta**

**codbixinta, ka dibna waa la daadinayaa, iyadoo dhacdadaas la diiwaangelinayo.**

**Qodobka 54aad:**

**Qoraalka Raadraaca Goobta Cod-bixinta**


Qodobka 54aad ee xeerka ee ka hadlaya qoraalka raadraaca goobta cod-bixinta waxa loo beddelay sidan:-

1. **Natiijada raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariyey komishanka doorashooyinka Qaranku ee ka kooban xaashi asal (original) ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo (copies) ah, iyadoo fagaare ahna waxa Guddoomiyaha Goobtu ku dhawaaqayaa:**

- a) **Tirada guud ee ka codaysay goobtaa;**
- b) **Tirada codadka xumaaday;**
- c) **Tirada codadka lagu muransan yahay;**
- d) **Tirada codadka Ansaxay; iyo**
- e) **Tirada ay kala heleen xisbiyada/musharrixiinta tartamay.**

2. **Xaashida asalka ah ee foomka ku xusan faqradda 1<sup>aad</sup> ee qodobkan waxa loo gudbinayaa Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada ee Gobolka, laba nuqulna waxa lagu ridayaa isla sanduuqa ay ku jiraan baqshadaha lingaxan ee ku xusan qodobka 55<sup>aad</sup> (1 iyo 2) ee xeerka iyo wixii ka hadhay agabkii doorashada waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Doorashada ee Degmada, saddexda nuqul ee soo hadhayna waxa la kala siinayaa wakiilada saddexda xisbi.**

**Qodobka 55/56aad:**  
**Shaqada Xafiiska Doorashada ee Degmada**



Qodobka 55aad, faqradiisa 3aad ee xeerka oo ku saabsan qaadista iyo wareejinta qalabka doorashada iyo qodobka 56aad, faqradiisa 3aad ee xeerka oo isna ku saabsan Shaqada Xafiiska Doorashada ee Degmada waa la tirtiray.

**Qodobka 57aad:**  
**Tirinta Cod-bixinta degmada**

Qodobka 57aad ee xeerka oo ku saabsan tirinta cod-bixinta Degmada waxa loo beddelay sidan:

**Xafiiska Doorashada ee Degmadu, markuu la wareego qalabka goobta doorashada, iyadoo ay goob-joog yihii wakiillada xisbiyada ee Xafiiska Doorashada ee Degmadu:**

- 1. Wuxuu hubinaya in ay baqshadaha kala duwani si hagaagsan u lingaxan yihii;**
- 2. Wuxuu hubinaya codadka wax-kama-jiraanka laga dhigay, wixii isbeddel ah ee halkaa ka soo baxana wuxuu ugu kala darayaa xisbiyada/musharrixiinta tartamay;**
- 3. Wuxuu go'aan ka gaadhayaa waraaqaha cod-bixineed ee lagu muransan yahay, iyadoo waraaqaha uu garto in la tiriyo uu xisbiyadu/musharrixiintu siday u kala heleen ugu kala darayo;**
- 4. Wuxuu go'aan ka gaadhayaa sanduuqyada goobaha cod-bixineed ee lagu muransan yahay, natijjooyinka goobahaa cod-bixineedna wuxuu**

ku qorayaa foomamka raadraaca natijjooyinka cod-bixineed ee goobahaas;



**5. Sanduuq cod-bixineed wuxuu noqon karaa:**

- a) mid la tiriyo, haddii loo aqoonsado in si sharciga waafaqsan loogu codeeyey;
  - b) wax-kama-jiraan, haddii ay sugnaato in si aan sharciga waafaqsanayn loogu codeeyey;
  - c) waxa waajib ah in sanduuqa lagu murmo xaaladda sugnaanshihiisa lagu go'aamiyo sugnaanshihiisa labada xaaladood ee ku xusan xubnaha "a" iyo "b" ee faqraddan midkood.
- 6. Go'aanka Xafiiska Doorashada ee Degmadu wuxuu ku ansaxayaa aqlabiyadda fudud ee hawladeennada xafiiska.**
- 7. Haddii uu Xafiiska Doorasho ee Degmadu muranka sanduuqa goobta cod-bixineed ama cabasho ku saabsan waraaqo lagu muransanaa dhammayn kari waayo amaba ay cabasho ka timaaddo dib-u-habaynta waraaqo xafiis doorasho ee goob cod-bixineed wax-kama-jiraan ka dhigay, wuxuu u gudbinayaa sanduuqa iyo warbixintiisa oo qoraal ah ama cabashada Xafiiska Doorashada ee Gobolka oo ku dedaali doona in uu muranka halkaa ku dhammeeyo.**
- 8. Wuxuu isu geynayaa natijjada doorashada ee dhammaan goobaha cod-bixinta ee degmada, waxaanu natijjada raadraaca doorashada ee degmada ku qorayaa foomka loogu talo-galay oo ka kooban xaashi asal ah iyo shan**

**xaashiyood oo nuqullo ah, iyadoo fagaare ahna wuxuu ku dhawaaqayaa:**

- a) tirada guud ee ka codaysay degmada,
- b) tirada codadka xumaaday,
- c) tirada codadka lagu muransan yahay,
- d) tirada codadka ansaxay, iyo
- e) tirada ay kala heleen xisbiyada/musharrixiinta tartamay;

9. Wuxuu u dirayaan Xafiiska Doorashada ee Gobolka xaashida asalka ah ee raadraaca natijada doorashada Degmada oo ay ku lifaaqan yihiiin xaashiyihii asalka ahay ee goobaha degmada iyo nuqulladii natijjooyinka dhammaan goobaha degmadu ridayaa sanduuqa, saddexda nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada saddexda xisbi ee Xafiiska Doorashada Degmada.

#### **Qodobka 58aad:**

#### **Shaqada Xafiiska Doorashada ee Gobolka**

Qodobka 58aad, faqradihiisa 1aad, 2aad iyo 3aad ee xeerka ee ka hadlaya shaqada xafiiska doorashada ee gobolka iyo u-gudbinta natijada Komishanka Doorashooyinka Qaranka, waxa lagu sameeyey wax-kabeddelkan:-

1. Ereyada ah “markuu helo nuqulka 3<sup>aad</sup> ee qoraalada raadraaca” ee ku qoran faqradda 1<sup>aad</sup> ee qodobka 58<sup>aad</sup> waxa loo beddelay “**markuu helo qoraalka raadraaca**”.

2. Xafiiska Doorashada ee Gobolku wuxuu ka go'aan gaadhayaa wixii cabasho ka taagnayd ama lagu muransanaa ee loo soo gudbiyey, iyadoo ay goob-joog yihiin wakiillada xisbiyada tartamayaana, wuxuu isu geynayaa natijjooyinka doorashada ee degmooyinka gobolka, waxaanu soo saarayaa:
- a) tirada guud ee codadka laga dhiibtay dhammaan degmooyinka Gobolka,
  - b) tirade guud ee codadka xumaaday ee degmooyinka Gobolka,
  - c) tirada guud ee codadka ansaxay ee degmooyinka Gobolka,
  - d) tirada codadka ay kala heleen xisbiyada tartamay;
- ka dib markuu natijjada doorashada ee gobolka geliyo foomka loogu talogalay, wuxuu iyadoo fagaare ah, ku dhawaaqayaa natijjada Doorashada ee Gobolka.
3. Xafiiska Doorashada ee Gobolku:
- wuxuu natijjada raadraaca doorashada ee gobolka ku qorayaa foomka ku xusan faqradda 2 ee qodobkan oo ka kooban xaashi asal ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo ah
- b) xaashida asalka ah, oo uu ku lifaaqan yahay nuqul ka mid ah natijjada doorashada ee degmo kasta oo gobolka ah, wuxuu u dirayaa Maxkamadda Sare;

- c) laba nuqul, oo ay ku lifaaqan yihin xaashiyihii asalka ahaa ee natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolkuna wuxuu u dirayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka;
- d) saddexda nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada saddexda xisbi ee Xafiiska Doorashada Gobolka.

### **Qodobka 66aad:**

#### **Adeegsiga iyo dhaqangalka wax-ka-beddelka iyo kaabidda Xeerka Doorashooyinka No.**

**20/2001**

1. Wax-ka-beddelka iyo Kaabista xeerka Doorashooyinka Lr. 20/2001, waxa loo adeegsan karaa oo keliya doorasho kasta oo ku salaysan nidaamka doorasho ee cod-bixiyayaashu diiwaan-gashan yihin ee laga qabto dalka JSL.
2. Wax-ka-beddelka iyo Kaabista xeerka Doorashooyinka ee Lr. 20/2001 wuxuu dhaqan-gelayaa marka ay Golayaasha sharci dejintu ansixiyaan uuna saxeexo Madaxweynaha JSL, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee dawladda.

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Ciro)  
Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

Maxamed Xasan Kaahin (Keyse)  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

# LIFAAQA 2AAD:

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



## THE PRESIDENT



JSL/M/DECM/249-3196/052010

17/05/10

## DECREE TO MADAXWEYNE NO:435/052010

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Go'aanka GW, Go'aan Lr. GW/KF-11/5/181/2010 ee ku suntan 10/05/2010 iyo Go'aan GG, Go'aan Lr. GG/JSL/79/05/2010 ee 16/05/2010 kaasi oo ay ku ansixiyeen Mashruuca Wax-ka-beddelka Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka & Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2001.

### Wuxuu Soo Saaray

Mashruucan oo lagu baahinayo dhaqan-galka wax-ka-beddelka iyo kaabidda lifaaqa Xeerka Doorashooyinka (Xeer Lr. 20/2001).

**Allaa Mahad Leh**

**Daahir Rayaale Kaahin**

**Madaxweynaha JSL**

The Republic of Somaliland  
House of Representatives  
Bad Quarter Hargeisa.



Jamhuuriyadda Somaliland  
Golaha Wakiilada  
Xarunta Hargeysa.

Ref: GL/1/CP-11/5/18/1/2010

Date: 16/5/2010

Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Wax-ka-bedelka ivoKaabidda  
Xeerka Doorashoovinka lifaaqa labaad (Xeer Lr:20/2001)

**GOLAH A WAKIILADA JSL**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 9 aad , 22 aad, 83 aad iyo 111 aad ee Dastuurka JSL.

**MARKUU ARKAY:** Go'aanka Ansixinta Guurtida GG/JSL/79/05/2010 ee 16/03/2010 kuna ansixieen cod aqlabiyyad ah 45 mudane gacantaag ah 1 mudanena ka aamusay iyaga oo ku ansixiyay siduu kaga yimi Golaha Wakiilada

**MARKUU TIXGELIYEY:** Baahida Loo qabo in la waafajijo nidaamka cusub ee Qaybinta kaadhadhka cusub ee xeerka doorashooyinka(Xeer Lr:20/2001).

**MARKUU KU QANCAY:** In lagama maarmaan ay tahay in la helo wax-ka bedel lifaaq labaad u noqon doona (Xeer Lr:20/2001)

**MARKUU GARAWSADAY:** Baahida loo qabo in aan dib u dhac ku iman doorashada madaxtooyada ee inagu soo fool leh.

**MARKUU U CODEEYEY:** Wax-ka badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Lifaqalabaad kal-fadhibgi 11<sup>aad</sup> ee Fadhibgiisii 41<sup>aad</sup> ee Golaha 10/05/2010 oo ay goobjoog ahaayeen 53 Xubnood oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.

**WUXUU**

Cod aqlabiyyad ah **(43) cod** oo gacan tag ah ku ansixiyey wax-ka-bedelka iyo kaabida xeerka Doorashooyinka lifaaqa labaad (**Xeer Lr:20/2001**), halka ay ka aamuseen **(9) mudane, cid diidayna** aanay jirin, **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

C/risaaq Sicid Ayaante  
K/S Xog. Guud ee Golaha Wakiilada

C/raxmaan Maxamed C/laahi(Ciro)  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

Website: www.somalilandhor.net

**WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABISTA  
LIFAAQA U AH XEERKA DOORASHADA  
MADAXTOOYADA IYO GOLEYAASHA  
DEEGAANKA (XEER Lr. 20/2001)  
LIFAAQA 2AAD**



**Wax-ka-beddelka iyo/ama Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanku waxa ay saamayn ku yeelanaysaa Qodobbada 5, 7, 12, 16, 17, 19, 20, 23, 25, 26, 32, 37, 42, 45, 47, iyo 65 ee Xeer Lr. 20/2001 iyo Lifaaqiisa 1aad.**

**Qodobka 5aad**

**Shuruudaha Cod-bixiyaha**

Qodobka 5aad ee Xeerka oo ku saabsan Shuruudaha Cod-bixiyaha waxaa lagu kordhiyay faqradd 5aad oo cusub oo u qormaysa sidan.

- 5) Murashaxiinta u tartamaaya jagooyinka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisu waxa ay ka codayn karaan goob kasta oo cod-bixineed. Hase yeesh ee hawl-wadeennada Doorashadu waa in ay arrintaas diiwaan-geliyaan.

**Qodobka 7aad**

**Shaqaalaha Dawladda iyo Hay'adaha Dawliga ah**

Qodobka 7aad, faqraddiisa 1aad oo waajibinaysa in Muddada uu Shaqada ka tagaayo qofka Shaqaalaha Dawladda ah ee isu sharraxaaya Doorashooyinka Deegaanka iyo Madaxtooyadu ay tahay 180 cisho ka hor taariikhda qabashada Doorashada waxaa loo beddelay:

**“Lixdan (60) maalmood ka hor taariikhda qabashada doorashada”**



### **Qodobka 12aad**

#### **Shuruudaha Xubinta Komishanka**

Qodobka 12aad, faqradda 2aad oo sheegaysa da'da xubinta Komishanka loo xulaayo waxaa loo beddelay:

**“Waa in aan da’diisu/da’deedu ka yaraan 40 jir kana waynaan 70 jir”**

### **Qodobka 16aad**

#### **Xafiiska Goobta Cod-bixinta**

Qodobka 16aad, faqradda 1aad oo xaddidaaya tirada hawl-wadeennada Xafiiska Goobta Cod-bixinta oo ka kooban Afar (4) xubnood waxaa lagu kordhiyay xubin shanaad oo noqonaysa:

**“Mas’uulka uruurinaaya cabashooyinka isla markaana tilmaamaaya cod-bixiyeyaasha (help desk office)”**

### **Qodobka 17aad**

#### **Xafiiska Degmada ee Doorashada**

Qodobka 17aad, faqraddiisa 1aad oo qeexaysa Qaab-dhisme edka Xafiiska Degmada waxaa loo beddelay sidan:

**“Xarunta Degmo kasta waxaa ka jiraaya Xafiis Doorasho Degmo. Waxaanu ka koobmayaa Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo Hubiye”**

Faqradda 3aad ee Qodobka 17aad waxaa loo akhriyayaa:

**“Guddoomiyaha, Guddoomiye Ku-xigeenka, Hubiyaha, Xog-haynta iyo tiriyeeyasha waxaa magacaabaaya Komishanka, isagaana awood u leh isku-beddelkooda”**

## Qodobka 19aad

### Hawl-wadeennada Xafiisyada Doorashada

- 9) Qodobka 19aad, faqraddiisa 1aad waxaa loo beddelay:



**“Xubnaha Komishanku u magacaabo xafiisyada Doorashada waa in loo sheego in xilka loo magacaabay ugu yaraan 60 (lixdan) maalmood ka hor taariikhda la qabanaayo doorashada”.**

- 9) Shuruudaha lagu soo xulanaayo Guddoomiyeyaasha Xafiisyada Doorashada Degmada iyo Gobolku waxa ay la mid yihiin kuwa lagu soo xulanaayo Komishanka Heer Qaran marka laga reebo da'da oo ah:

**“In aanu/aanay da'diisu/da'deedu ka yarayn 36 jir kana waynayn 70 jir”.**

## Qodobka 20aad

### Gunnada Hawl-wadeennada

- Qodobka 20aad, faqraddiisa 2aad oo dhigaysa:

**“Gunnada kala-badh ayaa la siinayaa haddii hawl-wadeenku yahay shaqaale dawladeed ama Hay'ad dawladeed (public bodies)”**

Waa la tirtiray, maadaama shaqaalaha dawladdu ayna ka mid noqon Karin hawl-wadeenada Xafiisyada Doorashooyinka ee Komishanka.

## Qodobka 23aad



### Qaabka Soo Bandhigidda Murashaxinta

Qodobka 23aad oo ka hadlaaya Qaabka Soo Bandhigidda Murashaxinta waxaa lagu kordhiyay saddex faqradood oo kala ah 5, 6 & 7:

- 5) Murashaxa isusoo sharraxay Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisu wuxuu qaatay u leeyahay in uu ka tanaasulo. Haseyeeshee waa in uu qoraal rasmi ah usoo gudbiyo Xisbigii uu ka sharraxnaa iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka ugu yaraan 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Xisbigii uu murashaxaasi ka sharraxnaa wuxuu soo beddeli karaa oo keliya **7** maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
- 6) Haddii mid ka mid ah murashaxinta Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisa ee Xisbiyada Siyaasaddu uu geeriyoodo ka dib marka la soo gudbiyo liiska murashaxinta, wuxuu Xisbiga ay khusaysaa xaq u leeyahay in uu soo beddesho **7** (**toddoba**)maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Haddii uu murashaxu geeriyoodo **7da** maalmood ee ugu dambeeya gudahooda, Xisbigaasi xaq uma laha in uu soo beddesho, xaaladaha ku saabsan bannaanaanshaha Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenka ee ku xusan Qodobbada 86aad iyo 89aad ee Dastuurka, waxaa loo tixraacayaa Dastuurka.
- 7) **Haddii muddada lagu cayimay faqradaaha 5aad iyo 6aad ee toddobada maalmood ah ay Xisbiyadu ku soo beddeli waayaan Murashaxii ay jagadiisu bannaanaatay sababaha ku xusan faqradaahaas**

**awgood, magaca murashaxa jagadiisu bannaanaatay  
ayaa lagu tartamayaa**

**Qodobka 25aad  
Deebaaji**



Qodobka 25aad ee sheegaaya in murashaxiinta u tartamaaya xilalku ay bixiyaan deebaaji aan celin lahayn waa la beddelay waxaana lagu beddelay sidan:

- a) Sl. Sh. 5,000,000 (Shan Milyan oo Shilin) murashixiinta Madaxtooyada midkiiba
- b) Sl. Sh. 1,000,000 (Hal Milyan oo Shilin) murashixiinta Deegaanka midkiiba.

**Qodobka 28aad  
Ololaha Doorashada**

Qodobka 28aad ee Xeerka oo ku saabsan Ololaha Doorashada waxbaa laga beddelay waxaana lagu kordhiiyay faqradd 3aad oo u qormaysa sidan:

- 3) Ololaha Madaxtooyada ee xilligani (Doorashada Madaxtooyada ee sannadka 2010) waxa uu noqonayaa muddo saddex toddobaad ah (21 maalmood), waxa uu Ololuhu bilaabmayaa 23 maalmood ka hor maalinta doorashadu ay dhacayso, waxaanu dhammaanayaa 48 saac ka hor maalinta codbixinta. Hase yeeshii, haddii Ololaha Doorashadu uu ku beegmo bisha Ramadaan waxaa la adeegsanayaa Qodobka 28aad, faqradda 2aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Lifaaqa u ah Xeer Lr. 20/2001 ee Golaha Wakiilladu ansixiyay 26/07/2009.

**Qodobka 32aad  
Wakiillada Axsaabta**



Qodobka 32aad, faqraddiisa 3aad oo dhigaysa in magacyada wakiillada Xisbiyada la geeyo Komishanka ama Xafiisyadiisa 10 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta waxaa loo beddelay:

**“Magacyada wakiillada Xisbiyada waa in la geeyo Komishanka ama Xafiisyadiisa 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta”**

**Qodobka 37aad  
Qalabka Xafiiska Doorashada**

Qodobka 37aad, faqraddiisa (n) ee Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka oo dhigaysa in Qalabka Xafiiska Doorashada ee Goobta la dhigo:

**“Aalad gaar ah oo lagu dalooliyo kaadhka cod-bixiyeyaasha (special instrument for punching voter’s cards)” waa la tirtiray.**

**Qodobka 42aad  
Xafiiska Goobta Codbixinta**

Qodobka 42 (1) (a) waxaa lagu kordhiyey in:

**“Mas’uulka ururinaaya cabashooyinku uu ka mid noqdo shaqaalah Xafiiska Goobta cod-bixinta”**

Waxaa qodobka lagu kordhiyay oo kale faqrad 5aad oo u qormaysa sidan:

- 5) Haddii ay Xisbiyada Siyaasaddu goob cod-bixineed u soo diran waayaan wakiillo, hawsha doorashadu u xannibmi mayso, hawl-wadeennada

Komishanka ee goobtuna shaqadooda way wadanayaan.



### **Qodobka 45aad**

#### **Tallaabooyinka Ka Horreeya Cod-bixinta**

Qodobka 45aad, faqraddiisa 1aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 waxa uu u qormayaan sidan:

Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa dhiiban karaa ka dib marka:

- 1) Uu Kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye-Ku-Xigeenka goobta codbixinta (ahna labada hubiye kooda ugu da'da weyn), si uu u hubiyo in uu yahay kaadh cod-bixineed oo sax (valid) ah, isagoo ka hubinaaya tilmaamaha kaadhka cod-bixiyaha liiska cod-bixiyeyaasha ansaxa ah. Isla markaana hubiyo in faryaradiisa bidix, haddii aanu lahaynna faryaradiisa midig, haddii aanu taana lahaynna meelaha muuqda ee jidhkiisa in aanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gudbiyo Xog-hayaha goobta, iyadoo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiillada Xisbiyadu, haddii ay goobta ku sugar yihiin.**
- 2) Goobta cod-bixineed ee cod-bixiyeyaashoodu ka bataan 750 codbixiye waxa loo kala jabinayaan (qaybinayaan) laba sanduuq oo ah A & B.**


### **Qodobka 47aad**

#### **Nidaamka Cod-bixinta**

Qodobka 47aad, faqradda 7aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 oo xusaaya in kaadhka cod-

bixinta la dalooliyo waa la tirtiray (**repealed**). Sidoo kale, waxaa la tirtiray faqradda 9aad,

laynka labaad oo u qoran “**Kadib markuu hubiyaha labaad dalooliyo**”



### **Qodobka 65aad**

#### **Dacwadaha Doorashada**

Qodobka 65aad, faqraddiisa 1aad ee Xeer Lr. 20/2001 oo qoraysa Soo Gudbinta Dacwadaha ku saabsan Doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa waxaa loo beddelay sidan:

- 1) Dacwadaha ku saabsan Doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha waxaa awood u leh Maxkamadda Sare, waana in dacwaddaasi ay soo gaadho Kaalinta Maxkamadda Sare 10 (toban) maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalinta ay Komishanka Doorashooyinka Qaranku ku dhawaaqaan natijada Ku-meel gaadhka ah. Maxkamadda Sare, waa in ay ka hor intaanay muddada Dastuuriga ahi dhammaanin ay go'aan kaga gaadho dacwaddaas. Haddii ay wakhtiga loo cayimay dhaafsto dacwaddaasi wax tixgelin ah ma leh.**

## **Qodobka 66aad**

**Adeegsiga iyo Dhaqan-galka Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista  
Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha  
Deegaanka Xeer Lr. 20/2001**

- 3) Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001  
waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha  
Sharci Dejintu ansixiyaan ee uu Madaxweynuhu  
saxeexo.

C/risaaq Siciid Ayaanle

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

C/raxman Maxamed C/lahi (Ciro)

Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

**Lifaaqa 3aad:**

**REPUBLIC OF**



**SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**



JSL/M/XERM/249-807/122011

Date...13/12/11

**XEER MADAXWEYNE №:0182/122011**

**Dhaagan-qalka Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golayaasha  
Deegaanka iyo Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2011 Lifaaqa 3aad**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Markuu arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markuu Helay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-16/551/2011, ee Ansixinta wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golayaashak Deegaanka iyo Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2011 Lifaaqa 3aad;

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo Saaray;**

**Qodobka 22<sup>aad</sup> oo ah habka doorashada Golayaasha  
Deegaanka;**

**Qodobkan oo ahaa habka liistada waxaa laga dhigay  
oo loo badalay sidan;**

1. Xisbi/Urur kasta oo doonaya in uu ka qayb galo doorashada Golayaasha Deegaan, waa in uu komishinka Qaranka u gudbiyo liiska musharaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in komishinku siyyaa musharax kasta astaan u gaar ah.
2. Kuraasta Degmo-doorasho, waxa Axsaabtu/Ururadu ku kala helayaan habka saami-qaybsiga (proportional Representation System) ee kuraasida iyo codadka Xisbi/Urur kasta ka helo Degmadaas, iyadoo uu Xisbiga/Ururkuna ay musharaxiintiisu ku kala guulaysanayaan sida ay u kala cod badan yihiin.
3. Musharaxiinta ku guulaysan waaya doorashada Deegaanka waxay noqonayaan kayd, iyadoo loo kala qaadanayo sida ay u kala cod badan yihiin, marka xubin ama xubno ka mid ah Golaha Deegaanku uu baneyyo xilka.

#### **Qodobka 33<sup>aad</sup> Faqradiisa 4<sup>aad</sup>**

Qodobkan 33<sup>aad</sup> Faqradiisa 4<sup>aad</sup> oo ahaa qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa in aanu/aanay da'diisu/Dadeedu ka yaraan 35-jir sanadka doorashada

Waxaa loo bedalay qodobka sidan:

**Qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa inuu/aanay Da,diisu/Dadeedu ka yaraan 25-jir sanadka doorashada.**

AllaaMahadLeh,

Axmed Maxamed Silanyo

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**The Republic of Somaliland  
House of Representatives  
Head Quarter Hargeisa.**



**Jamhuuriyadda Somaliland  
Golaha Wakilada  
Xarunta Hargeysa.**

Ref Gw/G/KF-16/1551/2011

Date 07/12/2011

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Wax ka-badalka iyo kaabista Xeerka  
Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka  
(Xeer No.20/2010) lifaaqa Saddexaad**

**GOLAHADA WAKILADA JSL**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 9<sup>aad</sup>, 22<sup>aad</sup>, 83<sup>aad</sup> iyo 111<sup>aad</sup> ee Dasturka JSL.

**MARKUU TIXGALIYAY:** Mooshinkii ay soo jeediyen Mudanayaasha Golaha wakiilada ee 10/10/2011 ee ku saabsanaa Wax ka-badalka iyo kaabista Lifaaqa saddexaad ee Xeer Lr.20/2011 Qodobadiisa 22aad iyo Qodobka 33aad faqradiisa 4aad

**MARKUU ARKAY:** Go'aanka ansixinta Waxka-badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka (Xeer (No.20/2010) lifaaqa saddexaad ee Golaha Guurtida JSL kuna taariikhaysnaa 23/11/2011 (Eeg Lifaaqa).

**MARKUU ARKAY :** In Golaha Guurtida wax ka badal iyo kaabis ku samaynint Waxka-badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka (Xeer (No.20/2010) lifaaqa saddexaad kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiiladu ugu Gudbiyeen .

**WUXUU**

Golaha Wakilada JSL, halkan ugu soo Gudbinaya Madaxwaynaha JSL Waxka-badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka (Xeer (No.20/2010) lifaaqa saddexaad si uu uga guto waajibaadkiisa dastuuriga ah.

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Sicid Ayaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakilada



Ciraxmaan Maxamed C/Laahifi(Ciro)  
Gudoomiyaha Golaha Wakilada JSL

**Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka doorashooyinka**

**Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka**

**(Xeer Lr.20/2011)**



Lifaaqiisa<sup>3aad</sup>

***Qoddobka 22<sup>aad</sup> oo ah habka doorashada Golayaasha Deegaanka;***

Qoddobkan oo ahaa habka liistada waxa laga dhigay oo loo badalay sidan;

1. Xisbi/Urur kasta oo doonaya in uu ka qayb galo doorashada Golayaasha Deegaan, waa in uu komishinka Qaranka u gudbiyo liiska musharaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in komishinku siiyaa musharax kasta astaan u gaar ah.
2. Kuraasta Degmo-doorasho, waxa Axsaabtu/Ururadu ku kala helayaan habka Saami qaybsiga (proportional Representation System) ee kuraasida iyo codadka Xisbi/Urur kasta ka helo Degmadaas, iyadoo uu Xisbiga/Ururkuna ay musharaxiintiisu ku kala guulaysanayaan sida ay u kala cod badan yihiin.
3. Musharaxiinta ku guulaysan waaya doorashada Deegaanka waxay noqonayaan kayd, iyadoo loo kala qaadanayo sida ay u kala cod badan yihiin,

marka xubin ama xubno ka mida Golaha  
Degaanku uu baneyyo Xilka.



### **Qodobka 33<sup>aad</sup> Faqradiisa 4<sup>aad</sup>**

Qodobkan 33<sup>aad</sup> Farqadiisa 4<sup>aad</sup> oo ahaa qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa in aanu/aanayda'diisu/Dadeedu ka yaraan 35-jir sanadka doorashada.

#### ***Waxaa loo badalay qodobka sidan:-***

Qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waainuu/aanay Da'diisu/Dadeedu ka yaraan 25-jir sanadka doorashada.

C/risaaq Siciid Ayaanle

C/raxmaan Maxamed C/Iaahi(Cirro)

Xoghayaha Guudee Golaha Wakiilada

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

Lifaaqa Afraad

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1218/072012

25/07/12

**XEER MADAXWEYNE Lr. 0250/072012**

Dhaqan-galka Wax Ka Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka  
Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 (Lifaaqa Afraad)

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Helay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL eek u suntan GW/G/KF-18/561/2012 EE 18/07/2012 ee Go'aanka Ansixinta Wax ka Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr.20/2001 (Lifaaqa Afaraad);

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Wax ka Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 (Lifaaqa Afaraad).

**Allaa Mahad Leh,**

**Axmed Maxamed Silanyo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



Ref: Gw/G/F-18/561/2012

Date: 18/07/2012

Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Wax ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtoyada iyo Golayaasha Degaanka Xeer (No.20/2001) Lifaaga Afaraad

**GOLAHAD WAKILADA JSL**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 9aad, 22aad, 83aad, iyo 111aad ee Dastuurka JSI

**MARKUU TIXGALIYAY:** Soo jedinta Xeer Madaxweyne ee ku taariikhaysan 18/06/2012 ee sumadiisuna tahay jSL/M/SHGW/081-1150/062012 kuna saabsana waxka bedelka iyo kaabista lifaaqa Afaraad xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Degaanka Xeer (Lr 20 /2012) lifaaqisa Afaraad

**MARKUU U CODEEYEEY:** wax ka bedelka iyo kaabista lifaaqa Afaraad xeerka Doorashooyinka madaxtooyada iyo Golayaasha Degaanka Xeer (Lr 20 /2012), ay ku soo sameeyeen golaha Guurtidu kal-fadhibigii 18<sup>sad</sup> ee fadhibigii 15<sup>sad</sup> ee Golaha 016/07 /2012 oo ay goob joog ahaayeen (44) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.

**WUXUU**

Cod aqlabiyyad ah Labaatan iyo sadex(23) cod oo gacan taag ah ku ansixiyat Wax ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtoyada iyo Golayaasha Degaanka Xeer (No.20/2012) Lifaaga Afaraad

halka ay ka diideen (19) Mudane, kana aamuseen (1) Mudane, Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

Crisaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

Ciraxmaan Maxamed Ctaahif(Ciro)  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL



## WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABISTA LIFAAQA U AH

### XEERKA DOORASHADA MADAXTOOYADA IYO GOLEYAASHA DEEGAANKA (XEER LR. 20/2001)

#### LIFAAQA 4AAD

*Wax-ka-beddelka iyo/amaKaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanku waxa uu saamayn ku yeelanayaa Qodobbada 1, 5, 6, 16, 22, 23, 24, 26, 27, 28, 29, 30, 32, 37, 42, 45, 46, 47, 51, 52, 54, 57, 58, 65, iyo 66 ee Xeer Lr. 20/2001 iyo Lifaaqyadiisa 1aad, 2aad iyo 3aad.*

#### Qodobka 1aad

#### Macnaha Erey-bixinta

Qodobka 1aad ee Xeerka oo ku saabsan macnaha erey-bixinta, ereyga:

**“Liis/Liisaska”:** Waxaa loola jeedaa murashaxiinta uu soo gudbiyay Xibi/Urur oo u qoran si taxane ah, iyadoo aanay kala hormarinta magacyadu wax saamayn Sharci ah yeelanahaynin;

#### Qodobka 5aad

#### Shuruudaha Codbixiyaha

***Waxaa la tirtiray:***

Qodobka 5aad ee Xeerka oo ku saabsan shuruudaha codbixiyaha, Faqraddiisa 4aad ee Lifaaqa 1aad oo dhigaysa: **“Waa inuu yahay cod-bixiye ka diiwaan-gashan goobta uu ka codaynayo, haddii aanu ka mid ahayn hawladeennada xafiiska**

*goobta codbixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta ama ciidanka booliska ee sida rasmiga ah ugu xilsaarar ilaalinta nidaamka goobta codbixinta”.*

### **Qodobka 6aad**

#### **Xuquuqda Codbixiyaha**

##### ***Waxaa la tirtiray:***

Qodobka 6aad ee Xeerka oo ku saabsan Xuquuqda Codbixiyaha, Faqraddiisa 1aad ee Lifaaqa 1aad oo dhigaysa: “***Inuu codkiisa ka dhiibto goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaan-gashan yahay***”.

### **Qodobka 16aad**


#### **Xafiiska Goobta Cod-bixinta**

##### ***Waxaa la tirtiray:***

Qodobka 16aad, Faqraddiisa 1aad ee Lifaaqa 2aad oo ku saabsan tirada hawl-wadeennada Xafiiska Goobta Cod-bixinta oo ku kordhiyay xubin shanaad oo noqonaysa:

***“Mas’uulka uruurinaaya cabashooyinka  
islamarkaana tilmaamaaya cod-bixiyeyaasha (help  
desk officer)”***

Waxa Qodobka 16aad Faqradiisa 1aad loo akhriyayaa sida uu dhigaayo Xeer Lr. 20/2001 oo ah: “***Xafiiska goobta cod-bixinta ee doorashadu wuxuu ka koobmi doonaa Gudoomiye iyo laba hubiye. Hubiyaha ugu da’da weyn ayaa noqonaya gudoomiye xigeen. Waxa kale oo uu yeelanaya xoghayn***”.



## Qodobka 22aad

### **Habka Doorashada**



**“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaanka, waa in uu Komishanka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah oo ku salaysan Habka Liistada Furax (Open List System). Waana in Komishanku siiyaa musharax kasta astaan u gaar ah.**

Waxaa la tirtiray Qodobka 22aad Faqraddiisa 2aad ee Xeerka, laynka labaad oo u qoran:

**“Tirada dadka liiska lagu qorayaa waa in aanay ka yaraan laban-laab xubnaha laga doonayo in degmo kasta laga soo doorto”**

## Qodobka 23aad

### **Qaabka Soo Bandhigidda Murashaxiinta**

Waxaa la tirtiray Qodobka 23aad, Faqraddiisa 3aad ee Xeerka oo dhigaysa:

**“Sida ay murashaxiintu liiska ugu kala horeeyaan ee la isugu xigsiiyey ayaa loo aqoonsanayaa in loo soo kala doortey ururka/xisbiga gudihiisa”.**

## Qodobka 24aad

### **Astaamaha Liistrooyinka Murashaxiinta**

- 1. Astaamaha liisaska murashaxiinta ee ururada/xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.**

- 
- 2. Xisbi/ururna waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi/urur hore ugu isticmaalay doorasho hore.**
  - 3. Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga, hase yeesh ee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo**

### **Qodobka 26aad**

#### **Qabashada Liisaska Murashaxiinta**

Waxaa la beddelay Qodobka 26aad, Faqraddiisa 1aad ee Xeerka oo tilmaamaysa:

***“Liistoooyinka murashaxiinta Madaxweynaha & ku xigeenkiisa waa in la geeyo xafiiska Komishanka, kuwa murashaxiinta degaanadana la geeyo xafiisyada doorashada ee degmooyinka ka hor 6da galabnimo maalinta 45aad intaanay cod-bixintu dhicin, iyadoo ay dhan yihiin lifaaqyadiisa ku tilmaaman xeerka”.***

Waxaa loo beddelay:

***“Iyadoo Liistoooyinka Murashaxiinta Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka sidoodii loo daayay, Liistoooyinka murashaxiinta Goleyaasha deegaanka waa in la geeyo xafiisyada doorashada ee degmooyinka ka hor 6da galabnimo maalinta 75aad intaanay cod-bixintu dhicin, iyadoo ay dhan yihiin lifaaqyadiisa ku tilmaaman Xeerka”.***

## Qodobka 27aad

### **Sheegidda Liisaska Murashaxiinta**

Waxaa la tirtiray Qodobka 27aad, Faqraddiisa 3aad, laynka 2aad oo odhanaaya: “**Waa in suuqa lala maro oo codbaahiye lagu sheego Liisaska Murashaxiinta**”.

## Qodobka 28aad

### **Ololaha Doorashada**

Qodobka 28aad ee Xeerka oo ku saabsan Ololaha Doorashada, Qodobka 28aad , Faqradda 2aad ee Lifaaqa 2aad iyo Qodobka 28aad , Faqradda 3aad ee Lifaaqa 3aad oo dhamaantood ku saabsan Ololaha Doorashada waxbaa laga beddelay waxaana lagu kordhiyay Faqradd 3aad oo u qormaysa sidan:

- 4) *Ololaha Doorashada Goleyaasha Deegaanka ee xilligan ay Xisbiyada/Ururradu tartamayaan waxa uu noqonayaa muddo dhan affar todobaad oo hal maalin la' (27 maalmood). Waxa uu Ololuhi bilaabmayaa 29 maalmood ka hor maalinta doorashadu ay dhacayso, waxaanu dhammaanayaa 48 saac ka hor maalinta codbixinta. Jadwalka Ololaha Doorashada waxaa soo saaraaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.*

## Qodobka 29aad

### **Qabashada Shirarka iyo Bannaan-baxyada**

Qodobka 29aad, Faqraddiisa 1aad ee Xeerkku wuxuu Duqa Magaalo siinayaa xaqaa uu ku mamnuuci karo bannaan-bax, haddii uu ku qanco inuu waxyeellaynayo caafimaadka iyo xasilloonida guud.



Waxa Qodobkaas loo beddelay:

**“Komishanka Doorashooyinka Qaranku waxa uu diyaarinayaa soona saarayaa shaxda tsu-soobaxyada iyo dhoollo-tusyada qorshaysan ee Xisbiyada/Ururrada ee muddada Ololaha Doorashada, oo Xisbiyada/Ururrada loogu qoondeeyey tiro maalmo ah oo isle’eg”. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiyeyaasha Gobollada iyo Degmooyinka iyo Duqa Magaalada waxaa ku waajib ah in ay ku dhaqmaan shaxda ay soo saareen Komishanka Doorashooyinka Qaranku xilliga ololaha doorashada.**

Waxaa la beddelay Qodobka 29aad, Faqraddiisa 2aad ee Xeerka oo tilmaamaysa:

**“Magaalo ama tuulo laguma wada qaban karo maalin qudha wax ka badan laba shir iyo banaan-bax”**

Waxaa loo beddelay:

**“Magaalo ama tuulo laguma wada qaban karo maalin qudha wax ka badan hal shir iyo banaan-bax”**

### **Qodobka 30aad**

#### **Muuqaalka Boodhadhka**

Waxaa la beddelay Qodobka 30aad, Faqraddiisa 1aad ee Xeerka oo tilmaamaya:

**“Muuqaalka boodhadhka iyo waraaqaha dacaayadaha ololaha doorashada waa in la geeyo xafiiska Gudoomiyaha degmada 48 saac**

*ka hor intaan shaaca laga qaadin. Mana jirto wax cashuur ah oo laga bixinayo arrintaas”.*

Waxaa lagu beddelay:

*“Muuqaalka boodhadhka, waraaqaha dacaayadaha ololaha doorashada iyo farriimaha ololaha doorashada ee Xisbi/Urur/Murashax waxaa oggolaanaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka islamarkaana joojinaaya haddii ay kasoo hor jeedaan Xeerarka iyo Anshaxa Guud. Mana jirto wax cashuur ah oo laga bixinayaa”.*



### **Qodobka 32aad**

#### **Wakiillada Axsaabta/Ururrada**

Qodobka 32aad, Faqraddiisa 3aad ee Xeerka iyo Lifaaqa 2aad oo ka hadlaaya wakiillada Xisbiyada/Ururrada waxaa loo beddelay sidan:

*“Magacyada wakiillada Xisbiyada/Ururrada waa in la geeyo Komishanka ama Xafiisyadiisa 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta”.*

4. Waxaa lagu soo xulayaa wakiillada Axsaabta/Ururrada Shuruudaha hoos ku xusan:
  - b) Waa in uu yahay/tahay muwaadin Somaliland u dhashay;
  - t) Waa in aanay/aanu da'diisu/da'deedu ka yarayn 25 jir sannadka doorashada la qabanayo;
  - j) Waa in uu/ay wax qori karo/karto waxna akhriyi karo/karto;

x) Waa in uu yahay/tahay qof xilkas ah oo dhaqan toosan.

### **Qodobka 37aad**

#### **Qalabka Xafiiska Doorashada**



Waxaa la tirtiray:

Qodobka 37aad, Faqraddiisa 1aad (l,m,n), 2aad (f), 3aad, iyo 5aad (a, b) ee Waxka-Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Lifaaqa 2aad oo dhigaysa in Qalabka Xafiiska Doorashada ee Goobta la dhigo:

- 1) Liiska rasmiga ah ee codbixiyeyaasha loo qoondeeyay in ay codkooda ka dhiibtaan goobtaa codbixineed;
  - m) Mastarad aanu dhererkeedu ka yaraanin khaanadaha liiska ee codbixiyaha maclumaadkiisu ku qoran yahay;
  - n) Aalad gaar ah oo lagu dalooliyo kaadhka codbixiyeyaasha (special instrument for punching voter's cards)".
- 2) (f) Liiska rasmiga ah ee codbixiyeyaasha degmada/gobolka
- 5)(a) Komishanku wuxuu tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta codbixinta ku jaangoynaya tirada cod-bixiyeyaasha goobta cod-bixinta ee ku cad liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha goobtaas cod-bixineed oo lagu daray tirada dadka ka hawlgelaya goobta cod-bixinta oo ka kooban hawladeennada xafiiska doorasho ee goobta codbixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka boliiska ee sida rasmiga

ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixinta.

Qodobka 37aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka, Farqadda 5aad, xarafka (b) iyo (c) waxaa loo beddelay sidan:

- b) *Komishanku wuxuu goob kasta oo cod-bixineed u diyaarinayaa waraaqo cod bixineed oo dheeraad ah oo aanay tiradoodu ka badnayn 2% tirada waraaqaha ee Komishanku u qoondeeyay goobta, lambarradooda iyo goobaha cod-bixineed ee loo kala dirayana lagu qorayo diiwaan gaar ah oo Komishanka Doorashooyinka Qaranku leeyahay; waxaana goobta loogu ridayaa baqshad xidhan oo gaar ah oo lagu rido sanduuqa doorashada ee goobta cod-bixineed.*
- c) *Waraaqaha dheeraadka ah waxa loo adeegsanayaa oo keliya beddelaadda waraaqaha cod-bixineed ee xumaada intaan lagu codeyn, taas oo ay waajib tahay in ay ku wada qancaan gudoomiyaha goobta iyo wakiilada Axsaabta/Ururrada u jooga goobta codbixinta. Mar kasta oo warqad ka mid ah waraaqaha dheeraadka ah lagu codeeyana waa in la diiwaan-geliyaa asbaabaha kalifay.*

### **Qodobka 39aad**

#### **Habaynta Liisaska Rasmiga ah iyo Goobaha Codbixineed**

Waxaa la tirtiray:

Qodobka 39aad, Faqraddiisa 3aad ee Lifaaqa 2aad oo u qoran sida:

  
“Liiska dadka ka diiwaan-gashan isku goob doorasho, waxay qoraal ahaan u kala horreynayaan siday xuruuftu u kala horreeyaan iyadoo laga duulayo magacooda 1aad haddii ay ku kala bixi waayaana magacooda 2aad, hadii ay kaas ku kala bixi waayaana kooda 3aad, haddii ay kaas ka sinmaanna kooda 4aad”.

### Qodobka 42aad

#### Xafiiska Goobta Codbixinta

Waxaa la tirtiray:

Qodobka 42 (1) (a) ee Lifaaqa 2aad oo tilmaamaysa in:

**“Mas’uulka ururinaaya cabashooyinku uu ka mid noqdo shaqaalah Xafiiska Goobta cod-bixinta”**

### Qodobka 45aad

#### Tallaabooyinka Ka Horreeya Cod-bixinta

Waxaa la tirtiray Qodobka 45aad, faqraddiisa 1aad iyo 2aad ee Lifaaqa 2aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 oo u qoran sidan:

Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa dhiiban karaa ka dib marka:

- 1) **Uu Kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye-Ku-xigeenka goobta codbixinta (ahna labada hubiye kooda ugu da’dha weyn), si uu u hubiyo in uu yahay kaadh cod-bixineed oo sax (valid) ah, isagoo ka hubinaaya tilmaamaha kaadhka cod-bixiyaha liiska cod-bixiyeyasha ansaxa ah. Islamarkaana hubiyo in far-yaradiisa bidix, haddii aanu**

*lahaynna faryaradiisa midig, haddii aanu taana lahaynna meelaha muuqda ee jidhkiisa in aanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gadbiyo Xog-hayaha goobta, iyadoo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiillada Xisbiyadu, haddii ay goobta ku sugar yihiin.*

- 2) *Goobta cod-bixineed ee cod-bixiyeyaashoodu ka bataan 750 codbixiye waxa 8loo kala jabinaya (qaybinaya) laba sanduuq oo ah A & B.*

Waxaa kale oo la tirtiray Qodobka 45aad, Faqraddiisa 2aad iyo 3aad ee Lifaaqa 1aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 oo u qoran sidan:

Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa dhiiban karaa ka dib marka:

2. *Uu xoghayaha goobtu ka helo magaca kaadhka ku qoran liiska rasmiga ah ee codbixiyeyaasha goobta, isla markaana uu hubiyo inay is waafaqsan yihiin lambarka kaadhka ku qoran iyo lambarka kaadhka ugu diiwaan-gashan liiska cod-bixiyeyaashu, dabadeedna uu codbixiyuhu suulka bidix saaro meesha liiska cod-bixiyeyaasha ah ee loogu tala-galay;*
- 3) *Uu tallaabooyinka faqradaha sare ee qodobkan ku xusan u gutto si dhamaystiran oo nidaamka waafaqsan, kuna wada qancaan hawladeenada iyo wakiilada Axsaabta ee goobta codbixinta ku sugani aaya cod-bixiyaha loo goyn karaa warqadda cod-bixinta.*

## Qodobka 46aad

### Codbixiyeyaaasha aan Codka Dhiibani Karin



Qodobka 46aad, Faqraddiisa 2aad ee Xeerku waxa uu tilmaamayaa in: ***"Haddii uu jiro qof ay naafonimo u diidey inuu codkiisa bixiyo Gudoomiyaha goobta codbixintu u ogolaanayo in cod-bixiye kale oo uu aaminsan yahay uu gacan siinayo oo ka caawinayo sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa".***

Haddaba, maaddaama uu heerka qoris-akhris la'aanta ee dalkeennu aad u sarreeyo, waxa Qodobkaas lagu kordhiyay:

***"Haddii uu jiro qof waayeel ah ama aan fahmi karahayn halka uu warqadda ka calaamadinayo, Gudoomiyaha goobta codbixintu wuxuu amrayaa in qof uu ku kalsoon yahay ama haddiiaanu jirinna hawladeenada goobtu ay gacan ka siiyaan oo ay ka caawiyaan sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa. Wakiilka Xisbiga/Ururka uu u codaynaayo murashaxiisu goobjoog wuu ka ahaan karaa".***

## Qodobka 47aad

### Nidaamka Cod-bixinta

Waxaa la tirtiray Qodobka 47aad, Faqradda 1aad (b & c) ee Lifaqa 2aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 oo xusaaya:

**b) kaadhka cod-bixiyaha u gudbinayaa Hubiyaha kale ee goobta;**

**c) xariijin ka tallaabinyaa magaca cod-bixiyaha iyo dhammaan xogta kale ee codbixiyaha ee ku qoran khaanadaha cod-bixiyaha ee liiska, isagoo**

*adeegsanaya mastaradda iyo qalin, ilaaliyana in magaca cod-bixiyaha iyo xogtiisa kaleba la akhriyi karo xarriijin-marinta ka dib.*



Waxaa la tirtiray Qodobka 47aad, Faqradda 6aad ee Lifaaga 2aad oo tilmaamaysa: “**Codbixiyuhu wuxuu u imanayaa Hubiyaha labaad ee loo soo gudbiyay kaadhkiisa**”. Qodobka intiisa kale waa la isticmaalayaa marka laga reebo soo gudbinta kaadhka.

Waxaa la tirtiray Qodobka 47aad, Faqradihiisa 7aad, 8aad (a,b,c,d,e), 9aad iyo 12aad ee Lifaaga 2aad ee Xeerka oo u qoran sidan hoos ku xusan:

7) *Intaas ka dib ayuu hubiyaha labaad siinayaa cod-bixiyaha kaadhkiisii oo uu dalooliyey, isagoo adeegsadey aaladda loogu tala-galay daloolinta kaadhadhka, cod-bixiyuhuna uu si degdeg ah uga baxayaa goobta cod-bixinta isagoo anshaxa dhawraya.*

8) *Qof kasta oo ka mid ah hawladeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka boliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaar anilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu, wuxuu codkiisa dhiibin karaa (isagoo u maraya tallaaboooyinka ku xusan 1 - 6 ee qodobkan) Isla marka goobta codbixinta la diyaariyo, ee hawladeennada Goobta cod-bixinta iyo wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixintu ay isla hubiyaan in kaadhka qofkaasi yahay mid sax (valid) ah horena aan loogu soo codayn, foomka uu Komishanka Doorashoooyinka Qaranku u soo diyaariyeyna lagu qoro:*

a) *magaciisa oo afarran;*



- b) lambarka iyo magaca goobta uu ka diiwaangashan yahay;
- c) lambarka iyo magaca goobta uu ka codaynayo;
- d) xilka uu ka hayo goobta cod-bixinta;
- e) saxeexa suulkiisa bidixna uu dhigo meesha foomka loogaga talo-galay.

9) Qof kasta oo ka mid ah dadka ku xusan faqradda 8aad ee qodobkan waxa kaadhiisa codbixinta haynaya ka dib murkuu hubiyaha 2aad dalooliyo Guddoomiyaha goobta codbixinta oo dib u siin karaa uun ka dib marka la soo gebagebeeyo hawsha doorasho ee goobta cod-bixinta.

12) Haddii uu cod-bixiye la yimaaddo goob cod-bixineed kaadh aan waafaqsanayn goobtaas, Guddoomiyuhu wuxuu u tilmaamayaa goobta cod-bixineed ee uu kaadhiisu waafaqsan yahay.

Waxaa la tirtiray Qodobka 47aad, Faqradda 13aad ee Lifaaqa 2aad ereyga: **“sita kaadh codbixineed”**.

### **Qodobka 51aad**

### **Tirinta Codadka**

Qodobka 51aad, Faqraddiisa 5aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka, wakiillada Xisbiyada waxaa lagu kordhiyay **“Ururrada”**.

## Qodobka 52aad



### Xidhitaanka Hawsha Tirinta

- 1) Qodobka 52aad, Faqraddiisa 1aad ee Xeerka oo tilmaamaysa tirada codadka uu helay Xisbi/Urur waxaa lagu kordhiyay "**Murashaxa**".
- 2) Qodobka 52aad, Faqraddiisa 2aad ee Xeerku waxa ay waajibinaysaa in dhammaan wakiillada Xisbiyadu/Ururradu ay saxeexaan dhammaan baqshadaha lagu riday agabka doorashada tirinta codadka ka dib.

***Haddaba Qodobkaa waxaa loo beddelay sidan:***

***"Si looga badbaado luminta codadka ay muwaadiniintu dhiibteen, waxa wakiilka Xisbi/Urur ku waajib ah in uu saxeexo buqshadaha ama uu qoraal kusoo gudbiyo sababaha uu u saxeexi waayay laguna rido sanduuqa".***

## Qodobka 54aad

### Qoraalka Raadraaca Goobta Codbixinta

Qodobka 54aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka oo ka hadlaaya qoraalka raadraaca goobta codbixinta waxaa loo beddelay sida:

- 1) ***Natiijada raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariiyey Komishanka Doorashooyinka Qaranku ee ka kooban xaashi asal (original) ah iyo kow iyo tobant xaashiyood oo nuqullo (copies) ah, iyadoo fagaare ahna waxa Guddoomiyaha Goobtu ku dhawaaqayaa:***
  - a) ***tirada guud ee ka codaysay goobta;***

- b) *tirada codadka xumaaday;*
- c) *tirada codadka lagu muransan yahay;*
- d) *tirada codadka ansaxay, iyo*
- e) *tirada ay kala heleen*

*Xisbiyada/Ururrada/Musharrixiinta tartamay.*



- 2) *Xaashida asalka ah ee foomka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa loo gudbinayaa Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada ee Gobolka, laba nuqulna waxa lagu ridayaa isla sanduuqa ay ku jiraan baqshadaha lingaxan ee ku xusan qodobka 55aad(1 iyo 2) ee Xeerka iyo wixii ka hadhay agabkii doorashada waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Doorashada ee Degmada, sagaalka nuqul ee soo hadhayna waxa la kala siinayaa wakiillada Xisbiyada/Ururrada.*

### Qodobka 57aad

#### Tirinta Codbixinta Degmada

- 1) Qodobka 57aad, Faqradihiisa 2aad iyo 3aad ee Lifaqa 2aad oo tilmaamaya sida natijada loogu diiwaangelinaayo Xisbiyada/Murashaxiinta, waxaa lagu kordhiyay “**Ururrada**”
- 2) Qodobka 57aad, Faqradihiisa 8aad, 8aad (e) iyo 9aad waxaa loo bedelay sida:
  
- 8) *Wuxuu isu geynayaa natijada doorashada ee dhammaan goobaha cod-bixinta ee degmada, waxaanu natijada raadraaca doorashada ee degmada ku qorayaa foomka loogu tala-galay oo ka kooban xaashi asal ah iyo kow iyo tobant xaashiyood oo nuqullo ah, iyadoo fagaare ahna wuxuu ku dhawaaqayaa:*

e) *tirada ay kala heleen*  
*Xisbiyada/Ururrada/Musharrixiinta tartamay;*

9) *Wuxuu u dirayaa Xafiiska Doorashada ee Gobolka xaashida asalka ah ee raadraaca natijada doorashada Degmada oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee goobaha degmada iyo nuqulladdii natijoooyinka dhammaan goobaha degmadu, laba nuqulna wuxuu ku ridayaa sanduuqa, sagaalka nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada Xisbiyada/Ururrada ee Xafiiska Doorashada Degmada.*

### Qodobka 58aad

#### Shaqada Xafiiska Doorashada ee Gobolka

- 1) Qodobka 58aad, Faqraddiisa 2aad iyo isla Faqradda 2aad, xarafka (d) ee Lifaaqa 2aad ee ka hadlaaya Xibsiyada waxaa lagu kordhiyay “*Ururrada*”
- 2) Qodobka 58aad, Faqraddiisa 3aad ee Lifaaqa 2aad ee ka hadlaysa Xafiiska Doorashada ee Gobolka, waxaa loo beddelay sida:

- a) *Wuxuu natijada raadraaca doorashada ee gobolka ku qorayaa foomka ku xusanfaqradda 2 ee qodobkan oo ka kooban xaashi asal ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo ah;*
- b) *Xaashida asalka ah, oo uu ku lifaaqan yahay nuqul ka mid ah natijada doorashada ee degmo kasta oo gobolka ah, wuxuu u dirayaa Maxkamadda Sare;*
- c) *Laba nuqul, oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee natijoooyinka*

*doorashada ee degmooyinka gobolkuna,  
wuxuu u dirayaa Komishanka  
Doorashooyinka Qaranka;*

**d) *Sagaalka nuqul ee soo hadhayna wuxuu  
kala siinayaa wakiillada  
Xisbiyada/Ururrada ee Xafiiska  
Doorashada Gobolka.***



### **Qodobka 62aad**

#### **Hubaal-celinta Doorashada Degaanada iyo Dacwadaha**

Qodobka 62aad, Faqraddiisa 2aad ee Xeer Lr. 20/2001 oo qoraysa Soo Gudbinta Dacwadaha ku saabsan Doorashada Deegaanka waxaa loo beddelay sidan:

2. dacwadaha ku saabsan Doorashada Deegaanka waxaa awood u leh Maxkamadda Gobolka waana in dacwadaas ay soo gaadhaa kaalinta Maxkamada Gobolka 7(todoba) maalmood gudahood oo ku bilaabanta maalinta ay Xafiisyada heer Degmo ee Komishinka Doorashooyinka Qaranku ay soo saaraan go'aanada doorashooyinka deegaannada sida ku cad Qodobka 61aad ee xeer Lr.20/2001. Cabasho kasta oo ka dambaysa mudada Qaanuuniga ahi waa waxba kama jiraan (null and avoid).
3. Maxkamadda Gobolku waa in ay ku go'aan qaadataa muddo 10(toban ) cisho ah gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta ay cabashadu soo gaadhaday kaalinta Maxkamadda Gobolka ee ay khusayso .Dhinac kasta oo aan ku qanacsanayn go'aanka Maxkamadda Gobolka

- waa in ay rafcaan qaadashadooda ku diiwaangeliyaan isla markaana xukunka lagu dhawaaqo waana in racfaan qaadashadooda u diiwaangeliyaan muddo 2(labo)cisho gudahood ah oo ka bilaabanta isla maalinta ay Maxkamaddu ku dhawaaqday go'aanka. Maxkamadda Gobolku waa in ay muddo 2(laba) cisho ah ugu soo gudbiso Maxkamadda Sare. Haddii ay isla maalintaa racfaan qaadan waayaan, xaq uma laha in ay dacwadoodu u gudubto Maxkamadda Sare;
4. Go'aanada Maxkamada Gobolka waxaa looga rafcaan qaadanayaa Maxkamadda sare oo ah Maxkamadda Dastuuriga ah. Maxkamadda sare waa in ay muddo tob'an cisho(10cisho) gudahooda ku soo saartaa xukunka iyo natijada kama danbaysta ah.

### **QODOBKA 66AAD**

**Adeegsiga iyo Dhaqan -galka wax -ka- bedelka iyo**  
**kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo**  
**Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 iyo**  
**lifaaqyadiisa**

Wax- ka- bedelka iyo kaabista Xeer Lr. 20/2001 iyo lifaaqyadiisa 1aad, 2aad iyo 3aad waxa uu dhaqangeleyaa marka ay goleyaasha Sharci dejintu ansaxiyaan ee uu madaxwaynuhu saxeexo.

# Lifaaqa shanaad

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



## THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-1260/082012

12/08/12

## XEER MADAXWEYNYE Lr: 0255/082012

Dhaqan-galka Wax Ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka  
Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 Lifaaqa shanaad

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Helay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/G/KF-Q11/563/2012 EE 11/08/2012 ee Go'aanka Ansixinta Wax ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 lifaaqa 5aad;

### Wuxuu Soo Saaray

Dhaqan-galka Wax ka Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 lifaaqa shanaad.

**Allaa Mahad Leh,**

**Axmed Maxamed Silanyo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**The Republic of Somaliland  
House of Representatives  
Head Quarter Hargeisa.**



**Jamhuuriyadda Somaliland  
Golaha Wakilada  
Xarunta Hargeysa.**

Ref: Cw/G/KF-Q 11/563/2012

Date: 11/08/2012

Ujeedo:- Go'aanka Ansixinta Waxka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada

Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka (XeerLr 20/2001) Lifaaga Saad

**GOLAH WAKILADA JSL**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 4aad, Faq(1). 8aad, faq (1aad) 9aad faq(1) 22aad faq(2aad) iyo 111aad ee dastuurka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

**MARKUU ARKAY:** Digreeto No: JSL/M/SHGW/081-1244/062012 ee 04/08/2012 kuna saabsanayd Xeer Lr 20/2001, Waxkabadelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka lifaaqiisa 5aad .

**MARKUU ARKAY:** Go'aanka ansixinta iyo Wax kabedelka Xeerka Doorashooyinka lifaaqiisa 5aad Ee Golaha Guurtida kuna taariikhaysan 11/08/2012 eeg lifaaqa

**MARKUU ARKAY:** In Golaha Guurtidu wax ka bedel iyokaabis ku samaynin waxkabedelkii iyo kaabistii xeerka Waxkabadelka iyo kaabista doorashooyinka lifaaqiisa 5aad Xeer Lr. 20/2001 kuna ansixiyen sidii Golaha Wakiiladu ugu gudbiyeen

**WUXUU**

Golaha wakiilada JSL halkan ugu soo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland Wax-Kabedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Xeer Lr. 20/2001 lifaaqiisa 5aad, si uu uga guto waajibaadkiisa dastuuriga ah.

ALLAA MAHADLEH

C/risaaq Siciid Ayaanle.

Cirrafaan Maxamed C/laahi (Cirro)

Xog.Guud ee G/Wakiilada JSL

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

WAX-KA BEDELKA IYO KAABISTA LIFAAQA U AH  
XEERKA DOORASHADA MADAXTOOYADA IYO GOLEYAASHA  
DEEGAANKA  
(XEER Lr.20/2001)  
LIFAAQA 5AAD



**Wax-ka bedelka iyo/ama Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanku waxa uu saamayn ku yeelanayaa Qodobka 7aad, Faqraddiisa 1aad ee Lifaaqa 3aad ee xeerka, Qodobka 9aad ee Xeer Lr.20/2001 iyo Qodobada 22aad iyo 24aad ee Lifaaqa 4aad ee Xeerka .**

**Qodobka 7aad**

**Shaqaalahaa Dawladda iyo Hay'adaha Dawliga ah**

Qodobka 7aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka oo waajibinaaya in muddada uu shaqada ka tagaayo qofka Shaqaalahaa Dawladda ah ee isu sharraxaaya Doorashooyinka Deegaanka iyo Madaxtooyadu ay tahay “**Lixdan (60) maalmood ka hor taariikhda qabashada doorashada**” 2Waa la bedelay waxaana loo bedelay: “**Sagaashan (90) maalmood kahor taariikhda qabashada doorashada**”

**Qodobka 9aad**

**Goobaha Codbixinta**

Qodobka 9aad ee xeer Lr.20/2001 waxaa lagu kordhiyay Faqrud 4aad, 5aad iyo 6aad oo u dhigan sidan hoos ku xusan:

**3) Haddii degaano dalka ka mid ah ay la soo gudboonaato duruufo culus ama xaalado aan saamaxayn in doorasho ka qabsoonto, waxaa soo qiimaynaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyagoo kala**

tashanaaya Xukuumada iyo Xisbiyada/Ururada Siyaasadda;



4) Goobaha Codbixinta ee ay doorashadu ka qabsoomi waydo , tirada kuraasida loo qoondeeyey goobahaas waxay Xisbiyadu /Ururadu u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee Degmada;

5) Haddiise ay doorashadu ka qabsoomi waydo Degmo dhan,waxa ay Axsaabtu/Ururadu kuraasida Degmadaas u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee Gobolka. Wuxaan loo raacayaa sida magacyadoodu ay liiska ugu kala horreeyaan.

### **Qodobka 22aad** **HabkaDoorashada**

Waxaa la bedelay Qodobka 22aad ee Lifaaqa 4aad ee xeerka oo dhigaaya:

**“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaan, waa in uu Komishanka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in Komishanku siiyaa murashax kasta astaan u gaar ah”**

Waxaana loo bedelay:

**“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaanka, waa in uu**

Komishanka Doorashooyinka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku sar-go'an tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah oo ku salaysan Habka Liistada Fur'an (Open List System). Waxa komishanka Doorashooyinka Qaranku uu siin doonaa murashax kasta lambar u gaar ah oo u noqon doona summad".

### **Qodobka 24aad**

#### **Astaamaha Liistooyinka Murashaxiinta**

Waxaa la bedelay Qodobka 24aad, Faqradiisa 1aad, 2aad iyo 3aad ee Lifaaqa 4aad ee Xeerka oo dhigaaya:

1. **Astaamaha liisaska murashaxiinta ee ururada/xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.**
2. **Xisbi/Ururna waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi/urur kale hore ugu isticmaalay doorasho hore.**
3. **Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa summada aqoonsiga, hase yeeshay waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo**

Waxaa lagu bedelay:

**"Lambarrada murashaxiinta ee Ururrada/Xisbiyadu waa in kala duwanaadaan marka la soo bandhigaayo, iyadoo la raacaayo habka uu Komishinku u soo dhigay"**

## Qodobka 66aad



**Adeegsiga iyo Dhaqan-galka Wax- ka -bedelka iyo**  
**Kaabista Xeerka Doorashooyinka**  
**Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer**  
**Lr.20/2001 iyo Lifaaqyadiisa**

Wax-ka- Bedelka iyo kaabista Xeer Lr.20/2001 iyo Lifaaqyadiisa 3aad, 4aad waxa uu dhaqan-geleyaa marka Goleyaasha Sharci Dejintu ansixiyaan ee uu Madaxwaynuhu Saxeexo.

C/raxmaan Maxamed C/laahi ( Cirro)  
guddoomiyaha golaha wakiilada jsl

C/risaaq Siciid ayaanle  
Xoghayaha guud ee golaha wakiilada

